DHAARTII DHABTA AHAYD

INDIANA UNIVERSITY
LIBRARIES
BLOOMINGTON

PJ
2534
.M39
D43
1986

Waxaa qoray :
G/Sare Maxamed Nuur Xasan
(Shareeco)

12 ABRIILE 1986 **Muqdisho**

TUSMADA BUUGGA

1. Khudbaddii ugu horreysay ee Ummadda Soomaaliyeed u jeediyey Madaxweynaha J.D.S. 23kii Okt. 1969 ..... 1 - 5
2. Halku-dhegga Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga S/Guud Maxamed Cali Samatar 7
3. Ararta Buugga ..... 9 - 11

QAYBTA HORE EE BUUGGA

4. Ciidanka X.D.S. ..... 14 - 20
5. Wax qabadkii Ciidanka X.D.S. ..... 20 - 28
6. Sheekh Abaadir Muuse ..... 29 - 30
7. Halgankii Axmed Gurey (1492) 30
8. Halgankii dheeraa Sayid Maxamed Cabdalla Xasan ..... 32 - 35
9. Dhalashadii Gobanimada ..... 35 - 36

QAYBTA LABAAD EE BUUGGA

10. Riwaayadda Magaceeda la yiraahdo "Gaadiidka beeshoo lagu guurayaan ahay" ..... 38 - 81

7/10/84

Madaxweynaha J.D.S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

DHAARTII DHABTA AHAYD

Kitaabkan aan ku magacaabay "Dhaartii dhabta ahayd", waxaan ku bilaabaynaa khudbaddii ugu horreysay ee uu Ummadda Soomaaliyeed u jeediyey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, 23kii Oktoobar 1969kii.

Waxay khudbaddani qeexaysaa sababtii ay Ciidammada dalku uga wareegeen taladii dalka, sababtaas oo ah qaskii siyaasadeed, kii dhaqaale, kii bulshadeed ee dalkeenna ka taagnaa.

Waxay kaloo khudbaddaasi inoo iftiiminaysaa himiladii uu Kacaanku lahaa iyo waddada horumarineed ee uu ku tashaday in uu ummadda qaadsiiyo.

Waxay haddana khudbaddu qeexaysaa siyaasadda gudaha iyo tan dibedda oo ahayd in dalka lagu hoggaamiyo siyaasad cad, taaso lagu bailan-qaaday Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad, si dhab ahna loo fuliyey, shacbiga iyo ciidammaduna ay u sacabbo tumeen.

KHUDBADDII UGU HORREYSAY EE UU UMMADDA SOOMAALIYEED U JEEDIYAY MADAXWEYNAHA JDS JAALLE SIYAAD 23 OKTOOBAR 1969

"Waxaan doonayaa inaan caddeeyo sababtii ku wacnayd la wareegidda dalka oo ay Ciidammada Qalabka Sida ku tallaabsadeen, waxaan kaloo doonayaa caddeennu in ay ogaadaan wax waliba in ay caadi yihiin, wax dhibaato ahina aysan ka imaan taladii ciidammada dalka oo idil, wuxuu gacanta ugu jiraa Xoogga Dalka iyo Booliiska, dadweynuhuna waa ku raalli; waana deggan yahay, oo waa ku faraxsan yahay".

Lama huraan bay ahayd Ciidammada Qalabka Sida in ay talada dalka soo fara gelshaan, mana suuroobeyn in la iska indha-tiro xummaantii dalka tiillay, sida musuqmaasuqa, laaluushka, qaraabakiilka, tuugeysiga xoolaha dawladda, caddaalad-darrida, xormo-darrida, diinta iyo qawaaniinta dalka oo sharciyadii ka degsanaa la iska tuuray, dadkiina waxaa loo horseeday in ay ku kacaan wax alla wixii ay doonaan.

Ma jirto koox ama qoys raaxo ku noolaan kara haddii aysan qawaaniinta iyo xeerarka maamuus u yeelan, haddii qawaaniinta la tuuro, wax horumar ah oo ummadi gaari kartaa ma jiraan, waxaynu u soo joognay dhibaatooyin fara badan oo ay ka mid ahaayeen ku-takri-falka xoolaha dawladda iyo hantida Qaranka, canshuurtii dadweynaha laga soo ururiyey ayey madaxdu danahooda ugu isticmaali jireen, dalka oo idilna waxaa loo adeegsaday sidii hantii gaar ah loo leeyahay, taasoo ummadda halis gelisay, gacan cadowna gelin lahayd.

Musuqmaasuqii wuxuu socdaba wuxuu heerkii ugu sarreeyey gaaray madaxdii dalka in la dilo kolkii lagu dhiirraday burbur ayey Soomaaliya qarka u saarnayd, xag dhaqaale, iyo xag siyaasdeedba, taariikhdeenna iyo qarankeennuba halis weyn bay ku jireen.

Annagu waxaannu ahayn Gaar-hayayaasha dalka iyo xeerarkiisa, haddana waxaa naloo dhaariyey danaha ummadda, sidee baynu isu moogeysiin karnaa kolka qawaaniintii aan waardiyaha ka ahayn ay burburinayaan?.

Taas baana sabab u ahayd soo fara-gelintii arrimaha dalka aynu soo fara gelinnay, ruuxii u qaata awood-raadis inaannu kursiga u nimid waa gefsan yahay, waxaannuu nimid qawaaniintii dalka inaanu soo celinno, ummaddana halkay mudan tahay aannu soo joojinno, khasab bay ahayd si degdeg ah inaannu tallaabo u qaadno.

Haddaynu arrintii dhawaan ka dhacday dalka dib ugu noqonno waxaynu arki karaynaa dal nabad ahi sidii khalkhal loo geliyey.

Askari aysan is-aqoon oo wax eed ah lahayn ayaa dilay Dr. Cabdirashiid Cali Sharmaake, Madaxweynihii dalka.

Iyadoo ay joogaan Hoggaamiyayaashii dalka oo ay ku jiraan Guddoomiyihii Baarlamaanka ayuu askarigaasi Madaxweynihii rasaas ku furay.

Sidee baynu arrimahaas iyo kuwo kale oo la mid ah oo ay dadka Soomaalidu og yihiin ugu dul qaadan karnaa, waxaan rajeynaynaa annaga oo llaaha weyn la kaashanayna inaan tirtirno xummaanta dalka ka jirta oo aannu raaxo iyo barwaaqo ugu beddelno, dadkeennana u suurto gelinno nabadda ay u baahan yihiin, umana dul-qaadan doonno qas-wadayaasha iyo kuwa qawaaniinta jebinaya.

Waxaannu doonaynaa Dastuurka in la dhowro, dadkuna ay ilaaliyaan, isna ixtiraamaan. Waxaannu baabi'in doonaa laaluushka, qaraabakiilka, iyo qabyaaladda, qabyaaladdu waxay ahayd waddadii keli ahayd ee ay shisheeyuhu dadkeenna ku qaybiyeen.

Waxaannu la dagaallami doonnaa nooc kasta oo gumeysi ah iyo kuwa u adeega ee dalka gudihiisa ku sugan, kuwa iimaan-laawayaasha ah ee la qabto iyagoo xummaan ku kacaya dadkeenna ayaan hor-keeni doonnaa, dabadeedna muwaadiniinta kale ee toosan waan ka takoori doonnaa.

Waddo kasta oo uu gumeysigu dalkeenna iyo arrimihiisa ka soo geli kara waannu awdi doonnaa, qawmiyad Soomaaliyeed oo xoog leh haddana midaysan, nabadna ku wada nool ayaannu dhisi doonnaa.

Haddii loo baahdo xoogga aannu haysanno oo dhan ayaannu ku edeegsan doonnaa, si aynu u xoojinno Diinta Islaamka oo lagu cayaaray, waxaannu doonaynaa Soomaaliya inaan ka dhigno waddan sharaf leh, dibedda iyo gudahaba, waxaannu dadka Soomaalida ah u horseedeynaa barwaaqada dhulka ku aasan in ay kala soo baxaan, iska daayaan baryada ummadaha kale.

Waxaan doonaynaa saaxiibnimada ummadaha kale ee doonaya in ay nala saaxiibaan, nabadda adduunka ayaannu taageereynaa, waxaannuna ka hor-jeednaa wax alla wixii wax gumeysta ama gudaha dalka ha joogeen ama dibeddaba.

Dadka Soomaaliyeed iyo dalkooda annaga oo ka wakiil ah, ayaannu talada la wareegnay, waxaan jeclaan lahaa dadka Soomaaliyeed oo idil inay u tafo xeytaan dhismaha dalkooda, in ay dhisaan ummad xoog leh, xoog iyo awood iyo maskax waxay haystaan inay u isticmaalaan horumarka dalkooda, baryadan ka fogaadaan.

Sidaad Raadiyaha ka maqasheen, waxaa la qabtay Baabuur dawladdu leedahay oo Tagsi laga dhigtay, saddex maalmood oo qura ayaannu talada dalka haynay, danta aannu leennahayna tallaabadaas aan qaadnay baa u marag ah, dadka Soomaaliyeed oo idil, waxaannu ka codsanaynaa in ay nala shaqeeyaan, si aannu u xaqiijinno horumar iyo guud ahaan hagaajinta xaaladda.

Gumeystayaasha doonaya inaannu mar walba barinnana waxay rabaan inaan gaajo, cudur, iyo jahli ku waarno, been badan ayey fidin doonaan, si ay danahayaga nadiifka ah u beddelaan oo waji xun u yeelaan, waxay isku dayi doonaan inay adduunka iyo weliba dawladaha Afrika beentoodaas ka

dhaadhiciyaan, beentaas ka sokow, magacyo xun-xun ayey inoo bixin doonaan.

Hadda oo la joogo waxay ursanayaan hub, lacag iyo wax alla wixii ay nagula dagaallami karaan.

Waxaan ku faraxsanahay midnimada Ciidammada Qalabka Sida iyo Ummadda Soomaaliyeed, ummaddu waxay na siisay taageero dhab ah, taasoo aan ka mahadcelinayno.

Midnimada Ummadda Soomaaliyeed ha noolaato.
Ha noolaato Tawradda daikeenna.

Madaxweyne Ku-xigeenka 1aad ee dalka JDS
Wasiirka Gaashaandhigga
Jaalle Sarreeye Guud Maxamed Cali Samatar

Halku-dhegga Waslirka Wasaaradda Gaashaandhigga, Jaalle Sarreeye Guud Maxamed Cali Samatar

Waxaa uu yiri Waslirka Wasaaradda G/dhigga, isagoo tixraac-aya ereyadii Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soom-aaliya, Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed waa ciidan awood u leh in ay ka hortagaan wixii cadaw u ah ummadda Soomaaliyeed, isla markaasna waa ciidan ay isku halayn karaan ummadda Soomaaliyeed.

Waa ciidan tayadiisu ay aad u sarreyso, caabiyina kara cadow kasta oo isu bahaysta, damcana inay ummadda Soomaaliyeed wax u dhimaan, isla mar ahaan taasna siin kara dersi lama ilaawaan ah.

Waa ciidan xag siyaasadeed, tababar, disabliin, aqoon militeri iyo aqoon guudba ka dhisan oo aanay marnaba suuroobeyn in lagu beero wax aan dan u ahayn ummadda Soomaaliyeed.

Ciidanka X.D.S. wuxuu ka soo horjeedaa qaa'imiinta u adeega gumeystaha, waxaana daacad u yahay dalkiisa, dadkiisa iyo hog-gaamiyaha Ummadda Soomaaliyeed Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

Ha noolaato ummadda Soomaaliyeed,
Ha jiro oo ha joogo Madaxweynaha J.D.S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre,
Ha jabo cadawga ummadda Soomaaliyeed,
Ha is-raacdo ummadda Soomaaliyeed.

ARAR

Taariikhda adduunka markii dib loo raaco waxaa muddo dheer soo dhisnaa ama ay lahayd ummad kasta oo meel kaga nool buqcadaha adduunka ciidan ilaasha. Qola kastoo xora isagaa dhowra ciiddeeda, calankeeda, baddeeda iyo ummaaddeeda.

Taas oo saldhig u ah xaqiijinta nolosha bulsho-weynta meesha ku wada nool, isla mar ahaantaas waxay dugsanayaan nebedgelyada ciidanka.

Ciidankaas oo u qaybsama noocyo kala duwan mar kastana diyaar u ah mid walba meesha lagu qaybiyey, hawshaas oo ah tan dibedda iyo tan gudaha.

Suurto-galna ma noqon karto Qaran meel ku wada nool inuusan lahayn ciidan daafaca oo daryeela nabadgelyadiisa.

Kama gaarno xusuus inaan soo koobno waxyaabaha ay qabtaan Ciidammada Qalabka Sida, hase yeeshee, Xoogga Dalka Soomaaliyeed waxa weeye, ciidan mar kasta heegan u ah dhibaato kasta oo soo foodsaarta ummadda Soomaaliyeed.

Nin kastoo Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ka mid ahna wuxuu ku "dhaartaa" markuu ciidanka soo galo ee uu dhammaysto tababarka loogu talo galay astaanta Ciidanka Soomaaliyeedna "luqunta" loogu xiray ayuu ku "dhaartaa Kitaabka Qur'aanka Kariimka ah", ee Muqadaska ah iyo magacyada Ilaahay, in uu dalkiisa, iyo calankiisa u huraayo naftiisa, cadow kastana uu ka daafacayo, fulinayana sharciyada qaranku ku dhaqmo iyo awaamiirta jaranjarada madaxda sida ay u kala sarreeyaan laga billaabo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqaraadiga Soomaaliya, Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga iyo

wixii ka hooseeya ee madaxa, wayna fuliyaan wixii saxa ee la faro ee dalka iyo dadka dan u ah.

Ummad kasta oo Ciidan lehna sidaas oo kale ayey u dhaariyaan ciidankooda, iyagoo ku dhaarinaya diinta ay caabudaan, sida aan annaguba ugu dhaarinno diinta islaamka ee muqadaska ah.

Waxaad ka arki kartaan qiimaha weyn ee ay ugu fadhido Diinta Islaamka Ummadda Soomaaliyeed, kuna abuuran yahay dhiiggeeda, lafahooda, dhuuxooda iyo jirkooda, muddo badan oo gumeysi ummaddani maamuli jirey, wuxuu ku dadaalay in uu ka beddelo isagoo ka been-sheegaya Diinta Islaamka oo leh "Waxaa jirta diin kaloo fiican, sida Diinta Masiixiga", hase yeeshee, ay suuroobi weyday in uu beddelo waana ku hungoobay ulajeeddadiisii uu watay.

Daafacaaddaas Diinta Islaamka, waxaa naftoodii u waayey geesiyaal fara badan oon la soo koobi karin tiradooda, laga soo billaabo **Axmed Gurey,** *ama ka horba, waxay ahayd Ummadda Soomaaliyeed kuwii rumeeyey Diinta Islaamka şoo bixitaankii* **Nebi Maxamed** *(Maka kaddib qoonkii labaad ee rumeeyey), taasoo caddeyneysa qiimaha weyn ee Diinta Islaamku ku fadhido, ummadda Soomaaliyeedna ay aamminsan tahay.*

*Marka Askariga Soomaaliyeed la dhaarinayo, waxaa lagu dhaarshaa sidaan kor ku soo sheegay ama aad ku aragtaan Jildiga korkiisa "Kitaabka Qur'aanka ee Muqadaska ah", oo gacanta loo saarayo qorigii uu dalka ku daafacayey iyo halmadkii (Helmet), hubka uu ku dagaallamo ka mid ah, iyadoo keli-keli midba mar gacanta loo saarayo oo uu leeyahay "***Magaca Ilaahay baan ku dhaartay***", Wallaahi baan ku dhaartay, Billaahi baan ku dhaartay, Tallaahi baan ku dhaartay" inaan dalkayga, calankeyga, dadkeyga aan nafteyda u hurayo,*

dhibaato kasta oo ku timaadna ka daafacayo, wax kastaoo danahooda ah oo ay faa'iido ku gaarayaanna ku daadihinayo.

Inaan sharciga qaranka iyo awaamiirta madaxdayda fulinayo hadday ummadda dan u tahay, dantaydana ka hormarinayo danta guud ee ummadda wax ugu oolka ah. Taas waxaa la yiraahdaa "Dhaartii dhabta ahayd" ee aad ku aragtaan Jildiga Buuggan.

Ararta Buuggan waxaa qoray:
G/le Sare Dr. Maxamed Nuur Xasan (Shareeco).

G/Sare
Dr. Maxamed Nuur Xasan
(Shareeco)

Inta aan la bilaabin buuggu waxyaabaha uu ka kooban yahay, waxaa suurta gal noqon karta inaan waxyaabo badan ka hor dhoco ama ka gadaal dhoco.

Taas oo ay sababtu tahay qofka aadamiha ahi inuusan wax walba u koobi karin sida ay yihiin, marka waxaan u sheegayaa akhristayaasha buugga markii ay helaan waxyaabaha buuggani ku qoran een dib ka soo sheegi doono inay xusuustaan maahmaahda ah "waxaan llaahay ahaynba way gafaan" waxaanse u sheegayaa inay dhab u akhriyaan kana codsanayaa inay ii soo tebiyaan wixii ay ku arkaan saan ugu iftiinsho oon jawaab u siiyo qancin karta, iyaguna ii soo iftiinshaan saan uga helo jawaabihii iga maqan oo ay iigu soo kordhiyaan.

Taas oo ay ula jeeddadu tahay in aan ka gaashaanto qoraaladayda danbe ee ku saabsan buugaagta danbe een jeclahay inaan qoro, haddana waxaan bilaabayaa boggii ugu horreeyey.

I- CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED

Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed waa ciidan ka dhashay bulsha weynta Soomaaliyeed ee dan yarta ah.

Wuxuuna halgankiisa bilaabay ilaa aas-aaskii leegada, 1943dii, ama ka hor baan dhihi karnaa, halgan dheerna u soo maray ilaa waqtiga iyada ah ee aan kor ku soo tilmaanay.

Halgankaas oo mar walba marka ay iska horyimaadaan shacbiga iyo gumaystuhu ay garab siin jireen Ciidammadu Ummadda Soomaaliyeed ee ay ka dhasheen, mar kastana lagu cadaadin jiray "maxaad gacan u siiseen" ama lagu ruqseyn jirey, ama lagu dili jirey, ama lagu xiri jirey.

Taasna waxaa soo caddeynaysa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya Jaalle Maxamed Siyaad Barre, oo ka mid ahaa raggii ay dhibaatooyinka ku soo gaari jireen, goob joogna ka ahaan jirey halgamayaashii iyo cadowga goobaha sy isaga hor yimaadaan ugana digi jirey in aan la layn habsiyaasadeedna wax walba u fushadaan, u tilmaami jireyna tabaha ay kaga gacan sarreyn karaan gumaystaha mar kastaba oo la iska hor yimaado guul darrana ka raaci jirtey gumeystaha iyo dabadhilifyadiisa.

Intaa kaliyata ma ahane waxaa jira kumanaan kale oo qaar ciidammada baaqi ku yihiin, qaarna da'oobay, qaarna qaranka jagooyin waaweyn ka hayaan.

Ciidankaas gumaystaha u shaqeyn jirey wuxuu lahaa magacyo badan oo kala duwan, xooggiisa weyn waxaa la oran jirey Jinta Amri, Gobolka woqooyina waxaa la dhihi jirey Soomaali Iskawt "Scoat".



TAALADA S.Y.L.



TAALLADA DHAGAXTUUR

Ciidanka Gobolkaan koonfureed joogi jirey waxaa la oran jirey booliis, hase yeeshee markii hore halganka isku sibey uga wada jireen labada dhinacba.

Markuu sannadku ahaa 1960kii waxaa dhalatay gobannimadii ay Ummaadda Soomaaliyeed ugu jirtey dagaalka, waxaana la magacaabay isla markiiba Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed oo qeyb ka mid ah laga soo soocay Ciidanka Booliska iyo qeybtii waqooyi ee la oran jiray Somali Iskawt.

Ciidankaas waxaad ku aragtaan calaamaddiisa jaldiga buugga.

Calankaas oo ah cagaardileen dhexda ku leh oo gaduudan, gorgor, gaashaan iyo laba waran lehna astaantii la siiyay Xoogga Dalka Soomaaliyeed, sida aan kor ku soo sheegay oo ka horreysa labada calaamadood tan qaranka iyo tan xoogga.

Waxaad kalood ku aragtaan jildiga calanka Unmmadda Soomaaliyeed ee buluugga ah iyo xiddigtiisii 5ta gees lahayd, waxaana ka horreysa Quraanka Muqaddaska oo ay ku dhaaranayaan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, mar kastana waxay diyaar u yihiin daafaca ciidda, calanka dalka Soomaaliyeed iyo Diinta Islaamka, waxaana la magacaabay 1960kii 12kii bishii Abriil, iyada oo uu ahaa Taliyihii 1aad ee Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed Allaha u naxariistee Jaalle Daa'uud Cabdulle Xirsi.

Waxaana abaan-duulaha 1aad ahaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya Jaalle Maxamed Siyaad Barre, goob joogna ka ahaa hoggaaminayayna ciidanka dagaalkii 1964tii ay ku soo qaadday Amxaarada dalka Soomaaliyeed, kagana gacan sarreeyay kuna jabiyay cadawga, ahaana ninkii ciidanka awaamiirta siinayey awaamiirta ay kaga gacan sarreeyeen, iyadoo caafimaad uu ku maqnaa Taliyihii

Ciidanka Jaalle Daa'uud Cabdulle Xirsi, dabadeedna ku soo geeriyooday dalka Talyaaniga.

Markaa ka dib waxaa loo magacaabay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed Jaalle Maxamed Siyaad Barre, inuu noqdo taliyihii Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Ciidankaas oo sida aan kor ku soo sheegay ka yimid bulsho weynta Soomaaliyeed ee dan yarta ah.

Ciidankaasoo disabiliinkiisa, tabarkiisa, aqoontiisa ciidammeed uu heer sare gaarsiiyey Jaalle Siyaad, muddo 9 sano ah oo walaahow ku dhacay dhiig badanna uu ku daatay iyadoo qabyaaladduna ay gaartay in qoysba qoys u awood sheegto, sababtana ay lahaayeen dibutaatiyaashii la kawsaday markii gobannimadu ay dhalatay.

taasoo sabab u noqotay in xataa la dilo Madaxweynihii Ummadda Soomaaliyeed ee markaa jirey Jaalle Cabdirashiid Cali Sharmaarke.

In kastoo ay jireen dhibaatooyinkaas qabyaaladduu saldhigga u tahay, gobannimaduna ay gaartay in ay maamulaan gumaystayaal, ciidda Soomaaliyeedna loo bixiyay qabrigii deynta, Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee uu hoggaaminayey Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxay ahaayeen kuwii ka ururaanaa ee aan ku dhex jirin arrimahaan kor ku soo sheegay, mar kastana u tilmaaami jiray ciidanka uu hoggaaminayey qiimaha qarannimadu ay leedahay iyo in ay mar kasta ka fogaadaan waxyaabihii ay ku dhex jireen dawladdii hoggaaminaysay Ummadda Soomaaliyeed.

Wuxuuna ahaa ciidan inkasta oy tiradiisu yarayd tayadiisu ay sarreysay, aadna u qiima badnaa

disabiliinklisa, aqoontiisa tababareed iyo waddaninnimadiisaba.

Isla mar ahaantaana waxay ku tallaabsadeen Golohii Sare ee Kacaanka inay u jaheeyaan Ummadda Soomaaliyeed midnimo iyo wadajir, si ay uga gacan sarreeyaan mar kasta qorshaha weyn ee gumaystuhu ku maamulayo addunweynaha qaarkii.

Kuwaasoo ah dawladaha soo koraya oo awooddooda dhaqaale, tan aqooneed aan isku filnaashaha gaari karin kuna kala nool Aasiya, Afrika iyo Laatiin Ameerika.

Qorshihii Golaha Sarana wuxuu noqday mid hirgalay, tilmaan dhab ahna u muujiyey Ummadda Soomaaliyeed, ayaagoo uga digaya qaababka uu gumaystuhu ku maamusho sida aan kor ku soo sheegay.

Madaxweynaha Ummadda Soomaaliyeed wuxuu u muujiyey adduunweynaha in uu siyaasaddiisa iyo tan dibaddaba ay Ummadda Soomaaliyeed kula dhaqmayso nin kasta nabadgelyo iyo is afgarasho.

Hase yeeshee mar kasta wuxuu u caddeeyn jirey ummadiisana u sheegi jiray in uusan ninna ka yeelin wax aan u dan ahayn Ummadda Soomaaliyeed, ninna uusan u noqon karin daba joog danahooda ay ku fushadaan.

Sidaa awgeed ayay Ummadda Soomaaliyeed waxay gaareen in ay ereyadooda iyo guud ahaanba ku magacaabaan geesigii Soomaaliyeed, wuxuu gaaray Jaalle Siyaad in uu saaxiib ka dhigto nin kasta oo Ummadda Soomaaliyeed wax ugu ool ah ee fulinaya qarannimadooda qiimaha ay ugu fadhido ummadda wixii dan u ah, waxaanu si is daba joog ah mar kastaba tilmaan u siinayay ama waano nin kasta oo ka dhashay Ummadda Soomaaliyeed ee ay ka dhumiyeen gumaystuhu qiimaha ay leedahay qarannimadu.

Sidoo kale waxaa mar kastaba kula garab taagnaa saaxibbadii oo ahaa kuwii la curiyey Kacaankii 21kii Oktoobar iyo Ciidammada Qalabka Sida, bulsho weynta Soomaaliyeedna waxay aragtay mar kastaba Ciidanka Qalabka Sida iyo madaxda hoggaaminaysaa in ay ku hawshoon yihiin wixii iyaga dan u ah.

Halkaana waxaa kaaga muuqanaysa in Ciidammada Qalabka Sida ay fuliyeen dhaartii ay ballan qaadeen, in ay mar kastaba heegan u yihiin naftoodana u hurayaan hor joogsiga cadawga nilcyihiisa kala duwan iyo xaqiijinta nabadgelyada gudaha, ka hor tegidda cudurrada iyo wixii la mid ah.

2- WAX QABADKII CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED IYO GUULIHII UU SOO HOYAY

Markii ay taariikhdu ahayd 1969kii 21kii Oktoobar waxaa si geesinnimo ah ula wareegay taladii Qaranka Soomaaliyeed Ciidammada Qalabka Sida, oo ay hoggaaminayaan Golihii Sare ee Kacaanka, tiradoodana ay ahayd 25 xubnood, oo saraakiil ah madaxna uu u ahaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya ahna Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

Sidaan kor ku soo sheegay Xoogga Dalka Soomaaliyeed oo ka amar qaadanaya Golihii Sare ee Kacaanka oo uu hogaaminayey Jaalle Siyaad Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxay ku guuleysteen in ay xaliyaan arrimahaan kor ku soo xusay, taageero weyna waxay ka heleen bulshada Soomaaliyeed ee muddada 9 sano ah ku soo dhex jirtey dhibaatooyinka.

Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed wuxuu muujiyey inuu diyaar u yahay daafaca Qaranka

Soomaaliyeed, waqti dagaal iyo waqti nabadeedba, waxaa xusuus mudan taariikhdana baal dahaba kaga qoran sida ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ay uga qayb qaateen hawlihii dalka lagu hormarinayay.

In yar dib u xusuuso taariikhda raadkeedu weli qoran yahay, ka feker kaalintii weynayd ee uu ka galay mashaariicda horumarinta wax la qabtay ama la dhisay oo uusan qeyb libaax ka qaadan, waxaa sheeko u baahan ololayaashii lagu hormarinayey dalka kaalintii uu ka galay.

Xusuus cutubyadii habeyn guureyntii ku caan baxay maseexdayaasha iyagoo guureynaya ka anbaday jidadkii u danayntii dadkii ay waxyeelaysay abaartii daba dheer.

Shaki kuma jiro Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed in uu muujiyay naftii horid iyo dadaal dheeraad ah, isagoo gudanayey waajibaadkii loo aas.aasay, iyo isagoo horseed u ahaa Kacaankii 21kii Oktoobar ee ummadda ka samata bixiyay halaaggii ay badeen talisyadii dibusocodka ahaa.

Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed hawlahaas uu ka waday dalka gudahiisa waxaa ku lammaansanaa tii difaaca qarannimada iyo calankaba.

Wuxuu dersi lama ilaawaan ah siiyay ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed nacab marar badan isku soo dayay inuu soo garddaraysto Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Nacallimka Ummadda Soomaaliyeed Jaalle Maxamed Siyaad Barre, khudbadihiisii qaayaha lahaa waxaa ka mid ahaa (WAA WAAJIB MUQADDAS AH IN AAN DALKEENNA KA DAAFACNAA CADAW KASTA OO ISKU DAYA INUU WAX YEELEEYO XORNIMADA JIRITAANKA IYO MIDNIMADA UMMADDA SOOMAALIYEED).

Qaranka Soomaaliyeed wuxuu leeyahay ciidan gaamuray oo leh lixaad ku filan xag tiro iyo tayaba, waxaana taasi marqaati ma doonta u ah sida uu had iyo goor uga gacan sarreeyo weerrarada huwanta xaaraanta ihi isugu soo bahaysteen inay wax yeeleeyaan Qaranka Soomaaliyeed, halkaasoo ciidankeennu ku muujiyay geesinnimadii ay hiddaha u lahaayeen heerka biseylka garaadkoosa siyaasiga ah, awooddooda milleterinimo iyo sarreynta mooraalkooda.

Sheeko uma baahna sida cadawga Xabashidu ugu dhacay jab iyo jaha wareer iyo guul darro aanu waligii ka soo waaqsan karin, taasina waxaa tusaale idinkugu filan jabkii Xabashida gaaray muddadii yarayd ee uu Xoogga Dalka Soomaaliyeed taageerayay Jabhadaha xaq u dirirka Soomaali Galbeed iyo Soomaali Abbo, guul darrooyinkii iyo halaaggii gaaray Xabashida.

Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed waxyaabihii uu qeybta libaax ka qaatay lama ilaawaanka noqday waxaa ka mid ahaa :-

1. U gurmadkii iyo ciribtirkii Cudurkii Daacuun Caloolada ahaa.
2. Daad gurayntii iyo dejintii dadkii ku tabaaloobay abaartii daba dheer ee dalka ku habsatay.
3. Ka qayb galkii Ololihii Horumarinta Reer Miyiga iyo qoristii afka Soomaaliga, oo muddada faraha badan dalka ka socday.
4. Ka qayb galkii dhismihii Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, taasoo markay ciidamada xukunka waddanka gacanta ku dhigeen horay ugu ballan qaadeen inay markay lagama maarmaan noqoto xukunka ku wareejin doonaan shacbiga Soomaaliyeed.
5. Ka qeyb qaadashadii joogtada ahayd oo ay ka qeyb galeen mashaariicdii dhismaha dalka lagu hormarinayey.



6. Ka qeyb galkii mashaariicda bacaad celinta oo waqti dheer socday.
7. Ka hortaggii shirqoolladii iyo inqilaabyadii isdabajoogga ahaa ooy dabadhilifyadu wadeen.
8. Ka qeyb qaadashadii dagaalkii taakulaynta Jabhadaha Gobannimadoonka Soomaali Galbeed iyo Soomaali Abbo.
9. Wuxuu qeyb libaax ka qaatay dabargoyntii qaadka iyo mukhaadaraadka.
10. Caabinta iyo baabi'inta weerarka is daba joogga ah ee Xabashida iyo xulufadooda had iyo goor ku soo qadayeen dalkeenna oo isugu jiray weerraro cireed iyo kuwa dhuleedba.
11. Ka qeyb qaadashada hawlgalka cusub ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo kacaanka toosinta.

Taariikhda Xoogga Dalka Soomaaliyeed kaalinta maaddiga ah ee uu ka soo qaatay horumarinta dhismaha iyo daafacadsiisa qarameed ma aha mid lagu soo koobi karo hadal la sheego, hawl badan ayayna u baahan tahay, arrintu si kastaba ha ahaatee waa ciidan ilaaliya xornimada, haybadda iyo jiritaanka shacbiga Soomaaliyeed ila markaana weyb halyayni o aka qaato horumarinta dalka Soomaaliyeed, una adeega mar kasta ooy la soo gudboonaato dhibaatooyin ay dabeecaddu keentay sida dagaalada, dadka, duufaanada, abaaraha iyo cudurada faafa oo dadku ku le'do.

Markaan si dhab ah uga hadalno arrimaha aan ka sheekaynana muxuu ku gaari karaa ciidan awoodda kor ku soo sheegnay.

A.- Waa in uu leeyahay disibiliin adag, is maqal u suurta gelin kara kala danbaynta iyo jaranjarada ciidanka.

Markuu ciidan leeyahay disibiliin adag sida uu sheegay Jaalle Siyaad, Madaxweynaha Ummadda Soomaaliyeed waxaa suurta gal u noqonaya ciidanka nidaamkaas disibiliinka ah leh in uu wax walba ku gaari karo awood aan soo noqosho laheyn, uuna gaari karo hadba wixii himiladiisu tahay, wuxuu yiri Jaalle Siyaad, disibiliinku waa inuu u adkaadaa sida birta.

B.- Waxaa kaloo ciidan awooddiisa ku meel marin karaa, markii disibiliinkiisu adkaado sidaan kor ku soo sheegay, tababar aqooneed oo her sara ah uu hantaa nocyada kala duwan ee ka mid ah hubka ciidanka uu ku dagaallamo, ha ahaado mid birriga lagula dagaallamo, mid badda lagula dagaallamo, ama mid cirka lagula dagaallamo, waana inuu si is daba joog ah waqti kastaba uga tabaabushaystaa in ay suurta gal nqon karto inuu cadaw soo weerari karo, isla markaana ciidankaasu yahay ciidan xag aqooneed ka diyaarsan wixii la soo baray.

Taana waxaa saldhig u ah mar kastaba disibiliin, aqoon iyo kaantarool joogto ah.

T. - Ciidanka wuxuu gaari karaa arrimahaan kor ku soo sheegay, in uu leeyahay madax hoggaamisa oo ah kuwa ku sifoobay aqoontooda wax qabasho, kuwa tilmaan ka bixin kara kuna toosin kara tubta mar kastaba lagu gaari karo gacan sarreyn lagaga gacan sarreeyo cadawga ama looga guulaysto indheer garadna ah, kuna xeel dheer habka hoggaaminta ciidanka ee afka ajnabiga loo yaqaan (leadership), taas ayaa muujisa ciidan wax tarkiisa awoodeed iyo ayadoo lagu maamulo si caddaalad ah, lana xaqiijiyaamar kasta sida uu ku nool yahay.

J. - Xiriirka ka dhexeeya ciidanka iyo dadweynaha, markaan guda galno kana sheekayno xiriirka dhex mari kara dadweynaha iyo ciidanka waa mid ah lagama-maarmaan in ciidanka iyo dadweynuhu leeyihiin xiriir garasho ku tilmaaman, garashadaas oo ah inuu ciidanku xog-ogaal u noqdo bulsho wenta Soomaaliyeed in ay tahay tuu ka beermay, loona diyaargareeyay in uu danahooda maamulo, cadawgana ka daafaco, soo dhaweyn iyo dul qaadasho ay ka mudan yihiin samirna ay u yeeshaan dhib kasta oo kaga yimaada Ummadda Soomaaliyeed, markii laga reebo kuwa dabadhilifyada ah ee uu gumeystuhu ku shaqeysto.

In ay ku abuuraan maskaxdooda in ay yihiin gaadiid goor kastaba uu jooga ummadda Soomaaliyeed, xusuus gaar ah mar kasta ay u yeeshaan (dhaarti dhabta ahayd ee ay ku dhaarteen), taasoo ah danahooda in ay ka hormariyaan danaha dadweynaha, waana midda u xaqiiqawday ciidanka Soomaaliyeed ayna mar walba ku gaarayaan guulaha is daba joogga ah, waajibkii ay farayeen Madaxda hoggaamisa ee Jaalle Siyaad, horseedka u yahay iyo madaxdii kale ee ku barbaartay,

tilmaan haddaan ka soo qaadanno waxaa ka mid ah Waaliirka Wasaaredda Gaashaandhigga Jaalle Sarreeye Guud Maxamed Cali Samatar.

3 X. - Dadwenaha Soomaaliyeed.

Sida aan kor ku soo sheegnay ama mar kastaba Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed Jaalle Siyaad, iyo ciidammadaba ay ballan qaadeen waa in ay ku kalsoonaadaan Ummadda Soomaaliyeed ciidammada qalabka sida ee uu horseedka u yahay Xoogga Dalka Soomaaliyeed, kalana dagaallamaya nin kasta oo damaaciya dalka, calanka iyo dadka nabadgelyadooda dibadda iyo gudahaba, ay leeyihiin ciidan ay ku faani karaan ahna mid waajibkiisa gudanaya waqti kasta oo loo baahdo.

Taasna waxaa marqaati u ah 1964tii, iyadoo 4 jirsatay gobannimada Ummadda Soomaaliyeed xag dhaqaale iyo xag ciidanba aad u yartahay tayadooda in ay weerar ku soo qaadday Dawladda Xabashida oo ciidankeedu uu ahaa ciidan jirey muddo aad u fara badan ugu yaraan 3000 (saddex kun sano) oo xag dhaqaale iyo xag hubeedna aad uga dhisnaa, xudduud beenaadka ay la leedahay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya Dawladda Xabashidu ciidankii ay u qorshaysay uu tiradiisu ahaa 25.000 (Shan iyo labaatan kun) haystana hub ku filan xag dhuleed iyo xag cireedba, annaguna uu ahaa ciidankanagu tiradiisu 5.000 (shankun) iyo hub yar oo ay Dawladda Ingiriiska iyo Talyaaniga nooga tegeen oo saa qiimo u lahayn, ayna nagu soo qaadday duullaan ay doonahayeen dalka dadka iyo calanka Soomaaliyeed ku qabsadaan.

Ayaga oo ay tilmaamo siinayeen gumeystayaal kale oo ay saaxiib ahaayeen, dagaalkaasu markuu bilawday waxaa gacan na siiyay intii tamartooda ahayd Dawladda Masar oo aan hagar naga gelin wixii ay noo heli kareen.

Ciidankii Xabashida oo uu ku talagalkiisu ahaa inuu maalmo yar ku qabsado Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya suurta gal waa u noqon weyday guushiina waxay raacday sida uu ka warqabo adduun wenaha 5.000 kun ee Ciidanka Soomaaliyeed oo uu hoggaaminayey Jaalle Siyaad, kana gacan sarreeyay 25.000 kun ee Ciidanka Xabashida oo ay soo hubeeyeen gumaystayaal fara badan.

Taa waxaa ka dambeeysay 1977kii, markii ay cutubyo ka mid ah ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ay siinayeen gacan gobannimaddoonkii Soomaali Galbeed iyo Soomaali Abbo, muddo 7 beri ahna ay ku gaareen guulo is daba joog ah, ciidankii la magac baxay Libaaxii Geeska Afrikana ee tiradiisu ahayd 13 Gaas cardaaduqaha ay ka dhigeen oo dhammaan ka xoreeyeen dhulka ay Soomaali leedahay ee gumaystuhu haysteen 95%, lagana dhigo Jaamacadaha Adduunka Taagtiigga iyo tabtii ay ku dagaallamayeen, waddaninimada iyo geesinimada ay ku jiirayeen goob kasta oo cadawga isku ururso cardaadiqana ay kaga dhigayeen.

Waxaadna halkaas ku arkaysaan ama idiin xaqiijinaysa Xoogga Dalka Soomaaliyeed ama ciidammada qalabka sida ee Soomaaliyeed, dhammaan in ay yihiin kuwii muujiyay arrimahaan kor ku soo sheegay, adduun weynuhuna uu marqaati ka yahay, waxayna mudan yihiin Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo ciidammada qalabka sida, **ammaan** aan la qiimeyn karin, **geesinimo** aan la qiimeyn karin, **wadaninimo** aan la qiimeyn karin, taariikhdana kaga qoran baal dahaba, is beddelka Jiilka Ummadda Soomaaliyeed ay u dhaqan geliyeen keydna ay uga dhigeen wax ay ku faani karaan wixii ay qabteen dagaalladii la soo gudboonaaday ee ay kala horyimaadeen cadawga Soomaaliyeed ciidammada

qalabka sida ee Soomaaliyeed, sidii ay uga gacan sarreeyeen ugana baabi'iyeen cadawga Ummadda Soomaaliyeed mid taariikh hore ahaa ama midka aan hadda kor ku soo sheegnay.

Waxaase jirta oo aan la ilaawi karin in uu markii uu ogaado in Ummadda Soomaaliyeed ciidammadeedu himaalidii ay lahaayeen in uu gaaro ayna ka gacan sarreeyaan cadawgu in gumeystuhu caadeysteen xag ciidan, xag dhaqaale iyo xag hubeedba ay ku taakuleeyaan Amxaaradu dawlado kale, lana soo dagaal galaan, haikaasna gumeystaha is biirsaday ay dhibaatooyin u geysteen Ummadda Soomaaliyeed ciidankeeda, Ciidanka Soomaaliyeed waxaa weeye kuwa markastaba u adkaysta dhibaato kasta, guushana aan lagala bixin gacmahooda.

4 - SHEEKH ABAADIR MUUSE WARWAAJECLE, IYO HALGANKUU SOO MARAY.

Dhibaatooyinka is daba joogga ah ee gumaystaha u geysanayo Ummadda Soomaaliyeed, asaga iyo kuwa gacanta siiyaba waxay soo bilawdeen muddo aad u fog taariikhduna ay ahayd ilaa qarnigii 6aad, taasoo si joogta ay guulo kas soo hoyn jireen Ummadda Soomaaliyeed cadowgooda, arrintu waxay soo socotaba waxay soo gaartay dagaalka Ummadda Soomaaliyeed iyo gumeystaha ay isaga soo horjeedaan waqtiga xaadirka ah.

Goobihii ay cadawyada isaga hor imaan jireen nimankii Diinta Masiixiga gacanta siinayey iyo Sheekh Abaadir, colkiisi oo mar kastaba difaacayay Diinta Islaamka, sidaas ayaadna ku xaqiiqsan kartaan Ummadda Soomaaliyeed in ay mar kastaba horseed u ahayd ayna amminsanayd Diinta Islaamka, Ummadda Soomaaliyeedna ay awood u lahaayeen taariikh kastoo la soo marayba inay hortagaana cadowgooda, iyagoo muujinaya geesinnimadoodii u dhalashada ahayd.

Intaa waxaan uga dan leeyahay inaan xasuusiyo Ummadda Soomaaliyeed heerarkeedii kala duwanaa ee ay soo mareen geesiyaashii Soomaaliyeed ee jiilba jiil jedelayay.

5 - QARNIGII 16AAD TAARIIKHDUNA AY AHAYD 1492 WAXAA BILAWDAY HALGANKII AXMED GURAY

Markaan ka hadalno taariikhda Axmed Guray, wuxuu dhashay taariikhdu markay ahayd 1506 wuxuuna ku dhashay tuulada Hohobta oo u dhexeyaa Jaldeesa iyo Herer, wuxuu ku bartay Herer waxbarashadiisii Diinta Islaamka, isla taariikhda iyada ah ee qarnigii 16aad Axmed Guray, waxay dagaallo badan laaga hor yimaadeen Axmaarada iyo ciidammadii gumaystaha ahaa, ee ay Axmaaradu is bahaysanayeen, haaa heeshee goobihii dagaallada ee kala duwanaa mar kastaba goobta dagaalka ayaga ayaa u hari jiray ee lagu hardamo.

Ciidammadii Soomaaliyeed ee uu hoggaaminayey Axmed Guray, taasoo ay taariikh caan ah ee ku qoran bugaag kala duwan ee uu ka mid yahay buugga la yiraahdo **Futuuxul Xabash**, buuggaas oo aan si fiican u faahfaahin doono kuna qori doono Af Soomaali aaga iyo buugaag kale oo aan ka helnay taariikhda Soomaaliyeed buugaagtaasna waxaa ka mid ah **Buugga Taariikhda Soomaaliya ee qaraonayd oo la caddeeyey.**

Halkaas waxaa ay geesiyaasha Soomaaliyeed ee cadawga la dagaallamaya mar kastaba ay ku dhaaran jireen magaca Ilaahay iyo Diinta Islaamka, inay difaacayaan dalkooda, dadkooda, dhulkooda iyo diintooda.



TAALADA AXMED GUREY

6 - HALGANKII DHEERAA EE SAYID MAXAMED CABULLE XASAN.

Waxaa uu **Sayid Maxamed Cabdulle Xasan,** halgankiisa bilaabay taariikhdu markay ahayd 1901kii, halgankaasoo ahaa mid daba joogay halgankii **Axmed Guray,** ee uu la dagaallamayay masiixiga ayuu Sayidkuna wuxuu abuuray ciidankii daraawiishta ee qasaarooyinka badan u geystay Dawladdii Ingiriirska ee ku soo tala gashay in ay dhalan rogto diinta iyo dadka Soomaaliyeed weyna u suura geli weyday, sababna waxaa u ahaa Sayidkii iyo ciidankii Soomaaliyeed waqti hore ha ahaato ama waqtigaan casriga ah ha ahaatee in ay hiddo u leeyihiin geesinnimo ay mar kastaba ku muujiyaan goobaha dagaalada una muujiyaan adduunka in ay ku mintadaan, dalkooda iyo dadkoodaba, nin kastoo isasoo mutaxana ama horornimo ku yimaadda ay gaarsiiyaan dhibaatooyin lama ilaawaan ah.

Intaa waxaan kaga baxayaa halgankii geesigii darwiishkii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, iyo ciidamadiisii uu ku hoggaaminayey anigoo buuggan aan ku soo koobeyn ulajeeddadooe ay tahay inaan xuso geesinimadii ay muujiyeen daraawiishtii iyo siidammadii Soomaaliyeed ee dagaalka kula jirey gumeystayaasha.

Dagaalladii uu Sayidka la galay Gumaystayaasha iyo goobihii ay dagaallsdu ka dhaceen.

1. Dagaalkii 1aad waxaa uu ka dhacay **Afbakayle 1901dii** waxayna guushii raacday Daraawiishtii.
2. Dagaalkii 2aad waxaa uu ka dhacay **Beerdhiga 1902dii** waxayna guushii raacday Daraawiishtii.
3. Dagaalkii 3aad waxaa uu ka dhacay **Cagaarweyne 1903dii** waxayna guushii raacday Daraawiishtii.
4. Dagaalkii 4aad waxa uu ka dhacay **Jidbaalle** 1904tii, dagaallo badan baana ka dhacay oo qolo walba ku khasaartay.
5. Dagaalkii 5aad waxa uu ka dhacay **Ruuga** 1913kii, waxayna guushii raacday Daraawiishta.
6. Dagaalkii 6aad, waxa uu ka dhacay **Dayuuradle** 1920kii, halkaasna waxa ay dhibaato weyn ku gaartay daraawiishtii iyo Ingiriiskaba.

Waxaa kaloo jiray dagaallo fara badan oo ay isaga horyimaadeen Daraawiishtii iyo Ingiriiska oo aannu hadda halkaan ku soo wada sheegi karin, hase yeeshee, kuwaa waxay ahaayeen kuwii ugu dardarraa, halkaasna waxaa ka muuqata Ciidammada Soomaaliyeed geesinnimadoodu in ay tahay mid taariikhiyan ah, ahna taxane ilaa waqtiga hadda aynu joogno, mar kasta waxaa garab socday haweenka Soomaaliyeed ee halgamadii is-dabajoogga ahaa mar kastaba ka hawl-gelayey dagaalkana ku jiray nooc kastaba ha ugu jireenee.

34 TAALADA XAAWO CISMAAN (X. TAAKO)

1948kii markii ay Leegadu u dagaallamaysay gobannimada Ummadda Soomaaliyeed oo ahaa Kacaankii 3aad, waxaa noloshoodii ku weyday geeslyaddii ka mid ahayd gabadha Soomaaliyeed Xaawo Cusmaan (Xaawo Taako), oo gacan ku-dhiigle uu u soo diray gumeystuhu uu wadnaha kaga dhuftay fallaar, gacan-ku-dhiiglahaas oo ahaa mid aan xusuus u lahayn haiganka lagu jiro iyo gobannimadu waxa ay tahay, xeeladaha noocaas ah ee uu gumeystuhu ku maamushana waxa naftoodii ku waayey ama xabsiga loo taxaabay geeslyaal fara badan oo ka mid ah Ummadda Soomaaliyeed, kuwa dhintay iyo kuwa jooga, dagaalkii 2aad ee ku xigay haiganki 1948kii, wuxuu ahaa dagaalkii Dhagax-tuur ee aad araqteen Taallada loo dhisay.

7) DHALASHADII GOBANNIMADA

Waxay arrintu saas ahaataba, waxay ku guuleysteen Ummadda Soomaaliyeed in ay gobannimo gaaraan 1960kii, markii ay gobannimadu dhalatay ayaa la aasaasay 12kii Abriil 1960kii Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, markaas ayey waxay ku dhaarteen in ay daafacayaan dalkooda, dadkooda iyo calankooda, in ay nin kasta oo u hawooda ay guul-darro uusan illaawin ay gaarsiiyaan, taasna waxa u dalill ah 1964kii, sida aan kor ku soo sheegnay, iyadoo Ciidanku uusan gaamurin in ay gumeystayaashu dagaal ku soo qaadeen, ayna kala kulmeen guul-darro, waxaana ka mid ahaa geesiyaashii ku geeriyooday dagaalkii 1964kii, anoon tiro ku wada gaarin sida geesigii Xalane ee calanka oo uu gumeystuhu goosan lahaa gacmihiisa ku soo qaatay kuna geeriyooday soona galbiyey Calankii gobanimada, taasna waxay ku tusinaysaa geesiyaasha Soomaaliyeed in ay mar kastaba ka dhabeeyaan dhaarta dhabta ah inay dhiiggooda iyo noloshoodaba u hurayaan ummadda Soomaaliyeed, Calanka iyo Ciiddaba.

8) Markii ay taariikhdu ahayd 1969kii markii ay u adkeysan waayeen Ciidamada Qalabka Sida dhibaatooyinkii ka dhacaayey Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, taas oo ay hoggaaminayeen madax uu ku shaqeysanayey gumeystuhu hababkii foosha xumaa ee la iska hor keenayey ummadda Soomaaliyeed Qabiil iyo qoys qoysna loo kala qeybiyey, dilka iyo gaajadiina ay saldhig u noqotay in lagula isticmaalo ummadda Soomaaliyeed, ahaydna arrin uu ka dambeeyey gumeystuhu ahna hababka cusub ee gumeystaha cusub isticmaalo, qaran dhisanna dhibaato u keenta sida hadda ka socota Lubnaan iyo meela kaleeto oo la mid ah ayey go'aan waxay ku gaareen in ay xilkii ka wareejiyaan dawladdii markaa maamuleysay dalka iyo dadka Soomaaliyeed.

Taas 1969kii habeenkii Talaadada ahayd 21kii oktoobar ay mayalka u qabteen ummadda Soomaaliyeed iyadoo uusan dhiig ku daadan, dantooduna ay ahayd in ay badbaadiyaan dadweynaha Soomaaliyeed ee aysan ahayn in ay darajo iyo awood doonaan, isla markii waxaa gacan ku siiyey sida aan kor ku soo sheegnay ummadda Soomaaliyeed oo garatay dhibaatooyinkii hor yiilay iyo xaqdarradii ay ku maamulayeen kuwii mujrimiinta ahaa hanti goosadka ahaa. Halkaana waxaa aad xaqiiqadii aad ka helaysaan Ciianka ummadda Soomaaliyeed ee horseedka u yahay Xoogga Dalka Soomaaliyeed mar kastaba in ay ka dhabeeyaan waxa la faro ee ummadda Soomaaliyeed dan u ah.

(Intaas waxaa kaga gudbeynaa buugga qeybtiisii hore)



TAALADA DALJIRKA DAHSOON

QAYBTA 2aad EE BUUGGA

Waxaan kaga hadlayna Riwaayad magaceeda la yiraahdo "GAADIIDKA BEESHOO LAGU GUURAYAAN AHAY"

1) Riwaayaddaas waxay ka hadlaysaa qiimaha weyn oo ay leedahay Bishii la aas-aasay Xoogga Dalka Soomaaliyeed sanadkuna ahaa 1960kii bishii Abriil 12dii, ulajeeddada magaca ri waayadduna waxaad ka garan doontaan heesaha riwaayadda iyo geeraarada kala duwan ee tilmaamaya wax qabadkii ciidammada Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

HEESKA 1aad MAGACIISA WAXAA LA YIRAAHDAA HIRASHADA ABRIILEY

Wuxuuna ka hadlayaa qiimaha weyn ee ay u leedahay ciidammada xoogga dalka Soomaaliyeed isaga ayaana heeska iskuu isu fasiraya, waana sida soo socota.

1. *Hirashada Abriilay*
   Lilbaan hagaagtaay
   Haaneedka guushaay
   Ciidan haybad weyniyo
   Gaashaandhigga la hubaa
   Cliddeenna hooyiyo
   Ma huraanka Calankaa
   Hagar li'i u daafaca
   Hareeraha dalkeenniyo
   Dhufeesyada horeetiyo
   Ku hagoogan jiidaha
   Haraatida gumeysiga
   Huwantii is kaashayday
   Cadaw kaa hor joogo
   Hanti qoosi diidaa

Nasiibkaagu helayoo
Hanbalyiyo Salaanbaan
Heegan kuugu nahayoo
Isu soo hilawnaye
Hirashada Abriilay
Heer sare ku noolaw
Dirir la isku hoobtiyo
Dagaal lays hamboorlyay
Guutooyin heegana
Weerarku is haleeleen
Kaarayaal hubeysani
Hardida isku qaadeen
Miigga samada aadaa
Haamaha bambada iyo
Gantaalaha hijinayaa
Hawada isku laayaan
Holacuna ariada gunay
Madaaflic hugmeysaa
Hareeraha ka dhacayaan
Ninba tabatrii hawl galay
Hanqar la isu soo riday
Kuwa libinta haystaa
Nasiibkaagu helayoo
Hanbalyiyo salaanbaa
Heegan kuugu nahayoo
Isu soo hilawnaye
Hirashada Abriilay
Heer sare ku noolaw.
Wax haatan joogiyo
Wixii hawl la soo maray
Himilada danbeetiyo
Ciidankaa hormood u ah
Maal iyo nafba u huray
Ku hurdaan dadweynuhu
Meleteri halgami iyo
horusocod kacaana

madax talada haysaa
Kuu huulinaysoo
Ku hogaaminaysee
Hanbalyiyo salaanbaa
Heegan kuugu nahayoo
Isu soo hilawnaye
Hirashada Abriilay
Heer sare ku noolaw.

Waxaana hal abuuray ereyada heeskaas Jaalle Maxamed Maxamuud, (Gacayte).

HEES

2) Waxaa heeskaan magaciisa la yiraahdaa Geed Hoos qabooboo hurdo lagu gam'aan ahay.

Wuxuu heeskaanu ka hadlayaa qiimaha weyn ee ummaddiisa ugu fadhiyo dhan kasta waxyaabaha uu u qabto Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo habka uu u hoggaamiyo hawlaha Qaranka daaficiisa iyo daryeelkiisaba.

Waxaadna ka arki doontaan marka aad u daadegtaan murtida heeska oo ka bilaabanaya sida soo socota, ahna ereyadii abwaan Maxamed Nuur Xasan (Shareeco).

Gargaaraha dalkeenoo
Lagu guurayan ahay
Geefanaha taaganee
Weligii aan gaminoo
Gaashaan biraan ahay
Gabaad cadawga celiyoo
Gayiga daafacaan ahan
Geediga hayaanka ah
Gargaaraha hogaanshee
Guusha u sidaan ahay
Geed hoos qabooboo

Hurdo lagu gam'aan ahay
Haybaddeeda gobanimo
Gidigoodba beelaha
Go'aanada ka soo baxa
Golayaasha qarankana
Geesi fuliyaan ahay
Odoyada gaboobiyo
Gabanada carruurta ah
Geedigii dadweynuhu
Midka loo guureeyee
Gaadiid sidiisii
Goor waibaba sidaan ahay
Midka sidigta gooraan
Garabkeeda taagane
Gamaska u afeystaye
Cadawga guulaysaan ahay
Guntimo isku xiran iyo
Gacmo wada jiraan nahay
Waxyeelada gumeysiga
Gashigeena kii qaba
Kan garwaaqsan baan ahay
Hadal iyo go'aankii
Taariikhda guunka ah
Wixii guban la soo maaray
Aan gadaal u raacnee
Xooggu wuxuu idiin galo
Ama uu idiin gudo
Ninka weli aan garanaw
Guudka calanka suraniyo
Gobanimada weydii.

Heeskaan aan hoos ku soo sheegi doonno wuxuu ka hadlayaa Qofka Qaran meteli kara iyo qiimaha uu qofku leeyahay u hawl gala ummaddiisa, daalkiisa iyo dadkiisaba waxaana la yiraahdaa heeska magaciisa.

Su'aal qaaya weyn leh
Daaha aan ka qaadnee
Qaran yaa meteli kara,
Waxay tahay jawaabtu
Qaran waxaa meteli kara.

1. *Maalintaay qaraar tahay*
Qalab la isu qaatee
Qoqob riix yimaadee
Quwad la isu sheegtee
Laba qaboo is dhaaftay
Qac iyo weerar keenaan
Qidad la isku dilayiyo
Dabin la isu qoolee
Qarxa oo dagaal dhoco
Kan naftiisa quuree
Qaaraha qandoodiyo
Aan ka bagin daafaca yaa
Qiimihiisa leh.

2. *Su'aal qiima weyn leh*
Daaha an ka qaadnee
Qaran yaa meteli kara
Qaran waxaa meteli kara
Qalabka jahliga iyo
Cilmiga qaali weeyee
Quruumaha addunyada
Qaaradaha is dhaafaa
Aan la quuri karinee
Ninka qalinka qaatee
Qoomiyad wax bara ee
Dad qufulan uruurshee
Indha qama dilaacshee
Qalbi furan ku go'an yahay
Quluubta u iftiinshee
Qormada aan ka daaline
Qarankiisa daafaca
Ayaa qiimihiisa leh.

3. *Su'al qiima weyn leh*
Daaha an ka qaadnee
Qaran yaa meteli kara
Qaran waxaa meteli kara
Nolosha qeybeheediyo
Quudka aadanuhu cuno
Haddii aan qar dheer
Iyo qarfa iyo dhib loo marin
Oon dhididka loo qubin
Quwad lagula soo bixin
Qabaw laguma helayee
Ninka hawl u quma ee
Ciidda qodashadeeda
Yaanbada u qaatee
Qayraadka xeebtana
Qunyar ugala soo baxa
Ee qaranka daafaca
Ayaa qiimihiisa leh.

4. *Su'aal qiima weyn leh*
Daaha an ka qaadnee
Qaran yaa meteli kara
Qaran waxaa meteli kara
Inkastoo qiyaamiyo
Qadar dhacay la celin karin
Qudha aan ku soconiyo
Naftu qaali weeyaan
Ninka qaabka cudurrada
Qumaati u yaqaanee
Qaabila dadkiisoo
Qatartii ku fooliyo
Quficiyo xanuunkiyo
Ka daweeya qoontoo
Loo qiro wadaninimo
Ee qaranka dafaca
Ayaa qiimihiisa leh.

Waana ereyadii abwaan Maxamed Nuur Xasan (Shareeco).

Heeska aan hoos ku soo sheegi doonno wuxuu ka hadlayaa waxyaabaha aan suura gal ahayn in la dhalan rogo ahna taarikhda dhabta ah ee aan horay u jirin in la hirgeliyo hase yeeshee markii uu dhashay Kacaankeenna barakeykan wuu soo nooleeyey ummadda Soomaaliyeedna baaqi ku ahaanaya inta nolosheedu jiri doonto waxayna tahay heestani midda aan hoos ku soo sheegi doonno murtideedana aad u dhuuxa waxyaabaha ay ka hadlayso.

Waxaana la yiraahdaa magaceeda
Runta aan u beymee
Boqolaal kunoo sano
Baaqiga dunida haray
Dad kastoo is biirsada
Ballan qaadyadii fulay
Kacaanku uu bayaanshay
Haddaan been la sheegeyn
Ma bur burin karayaan.

1. *Afkii hooyo hooyo*
Bohol lagu tuuray
Beri hore
Dheguhuna berjoobeen
Indhahana bir lagu xiray
Inta beledka joogtiyo
baadiyaha gaartay
Ay barteen dadweynuhu
Lagu wada baraarugay
Buugaagta lagu qoray
Barayaashu fuliyeen
Barqa ubaxa loo lulay
Bar ma tahay tilaamoo
Cidna aanay bedeli karin.

2. *Talooyinkaa badan*
Buuraha ka muuq dheer
Geesiyadii badnaayee

Xornimada u ruux baxay
Magacoodii baaba'ay
Bilicda loogu muujee
Lagu baro adduunyada
Bar ma tahay tilmaanoo
Cidina aanay bedeli karin.

3. *Laamiyaasha badanee*
Bilicda iyo quruxda leh
Baalaha dalkeeniyo
Gobolada u kala baxa
Oo baaxadoodiyo
Balacoodu weyn yahay
Baabuurtu isku dhaafaan
Bil halkii la dhigi jiray
Barqa gaaban lagu tago
Bar ma tahay tilmaanoo
Cidina aanay bedeli karin.

4. *Bacaadkii ku soo jabay*
Buufaw aktiisiyo
Beeraha Shalaanbood
Sida loo badbaadshee
Dhirta loogu beeree
U nagaatay beeshi
Iyo biya xireenada
Wabiyada ku baal yaal
Barwaaqeynta ciidiyo
Bilicda loogu tal agalay
Bar ma tahay tilmaanoo
Cidina aanay bedeli karin.

5. *Dhismayaasha badanee*
Beledyada ku kala yaal
Wershadaha bulxamayee
Qaar waliba baab yahay
Dekedaha balaarane
Ku xamilan baddeenaa

Maraaklibtu buuxaan
Bar ma tahay tilmaanoo
Cidina aanay bedeli karin.

Waa ereyadii abwaan Maxamed Nuur Xasan (Shareeco)

Mar kastaba Ciidammada Qalabka Sida ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed waxay heegan u yihiin cadaw kasta ee damaaciya dalkooda in ay ka hortagaan, isla markaasna waxaa kalooy heegan u yihiin dhibaata kasta ee soo food saarta ummadda Sooaamliyeed in ay ka hortagaan, dhibaatooyinkaas oo noqon kara nooc kasta mid Cudur, Jahli, Gaajo, Abaar iyo wixii la mid ah.

Sidaa awgeed heeska aan hoos ku soo sheegi doonno wuxuu tilmaan ka bixinayaa in uu ciidanka xoogga dalka Soomaaliyeed uu yahay midka uu ku hurdo dadweynaha Soomaaliyeed waqti dagaal iyo waqti nabadeedba, waxaadna ka heli doontaan murtida heeska soo socda magaciisana la yiraahdo HADDII AY GURACANTIYO HADDII NABAD LA GAARABA ANIGA GAAR HAYAAN AHAY.

1. *Haddii nabad la gaariyo*
   Haddii ay guracantoo
   Xaajadu gadoodoo
   gartu ay adkaatoo
   Heshiin weydo guurtadu
   Is afgarasha waa dhoco
   Anigu gaar hayaan ahay
   Beeshu ay ku gama'doo
   Gabal dhiciyo waaberi
   Igu giigsn tuutuhuyoo
   Gumuciyo rasaastiyo
   Qorigayga gaanka ah
   Yaa garabka ii suran.

2. *Gaadaha wareegiyo*
Goor xun socod habeynkii
Midka gees ka soo dhaca
Gumeysi u adeegaha
God haddii uu gala iyo
Guri hadduu ku dhuuntaba
Inuu gacan ku soo dhigo
Midka loo gardaadshoo
U gaashaaman baan ahay
Igu giigsan tuutuhuyoo
Gumiciyo rasaastiyo
Qorigayga gaarka ah
Yaa garabka ii suran.

Waana ereyadii abwaan Maxamed Nuur Xasan (Shareeco)

Bal haddana aan u beyrno xagga Jacaylka hees ka warramaysa Gabar iyo Wiil is jeclaaday, wiilkuna uu ciidammada xoogga dalka Soomaaliyeed ka tirsan yahay iyo gabar Soomaaliyeed oo jeclaatay Qaranka Daafaca dalka Soomaaliyeed.

Heeskana magaciisa waxaa la yiraahdaa LAAMAHA UBAXA IGA HOO

GABADHA

1. *Xalay layl dhexaadkii*
Lahankiyo kuleylkii
Maraan leydh u soo baxay
Oon eegay laxahiyo
Ururada lamaanka ah
Libiqsiga indhaha
Laacaagu ii baxay
Intaan laba lixaadsaday
Ku lugo'ay habeynkii

Sawir aan la hel karin
Anoo laabta ku hayoo
Soo laacdankaagii
Sida laama doog baxay
Isku laaqay faraqyadu
Ayaad iigu larantee
Laabta laabta ii saar.

WIILKA

2. Amba lahaanshadaadii
Hurdo maanan ladinoo
Laama doodi waayee
Luquntaada dheeriyo
Laafyaha garaaraha
Aad soo luleysiyo
Leeg leegsigaagaa
Laqanyaygu kiciyoo
Leeleelka caashaqa
Anaa kaaga liitee
Abriil labiyo tobankeed
Haddii aan ku ladhanoo
Lalabuhu u shidan yahay
Guur nooma laabnee
Laabta laabta ii saar
Legga kalay igi qabo
Laabta laabta ii saar.

Waa ereyadii abwaan Maxamed Nuur Xasan (Shareeco)

Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed waa ciidan leh Tababar aqooneed oo heer sare ah iyo xirfado kala duwan, taasna waxaad ku arki doontaan heeska ku qoran ka dib marka aad murtidiisa akhrisaan waana sida soo socota.

1. *Gaashaandhig tababariyo*
Turuq iyo ilxaadiyo
Taya iyo aqoon loo
Tumaantiga dagaalkiyo
Tabta cadáwga loo dilo
Loo tababaroo
Waxaa nahay tanaadee
Calankeenaa taaganee
Toosanee ilwaada leh
Gobanimada taamka ah
U adkeeyay tiirkoo
Tubta aan ku soconiyo
Tigaadiyo barwaaqada
Ummadda ugu taliyo
U tilmaama khayrkee
Intaan guulo tacabnee
Taxanee is daba yaal
Tiro laguma gaaree
Gaasimo tilmaamanoo
Adduunyadu taqaanoo
Aan naga tirmeyn baan
Taariikh u leenahay
Tabaalaha gumeysiga
Ummaddii tab iyo xeel
Talaaba uga qaadee
Tusma wada mareysee
Tiigsanaysa gobanimo
Taageerodoodaan
Taariikh u leenahay
Taakulaynta shacbkiyo
Tabantabadiisii
Kii tabar yaraadaba
Tunka inaan ku qadnoo
Aanaan ka teginbaa
Taariikh u leenahay.
Turaabtanu leenahay
Cadawgii ku tala gala

'Inuu soo taraaroo
Taaka cildda soo galo
Inaanaanu u turinoo
Tagoogaha ka jabinoo
Tarab tarab u leynoo
Tooganoo dilnaabaan
Taarilkh u leenahay.
Tartarada adduunyada
Dawladaha ku teedsanee
Tarsiyadu dhex yaalaan
La isku gacan togaafeyn
Runta inaanu taabnoo
U tilmaanoo samahoo
Nabaddaan ka tilaamn
Taarilkh u leenahay.
Diinta tiirkeediyo
Tastuurka iyo xeerkaan
Taabbab u nahayoo
Tusaalaha kacaankiyo
Tusmada madaxda jeexdiyo
Shacbiga inaan tixgelinoo
Wixii tuur u yeeliyo
Turxaanta aan ka dhawraa
Taariikh u leenahay.
Tooxashada qabiilkiyo
Tirtirsiga iyo xeerkii
Uu ka tegay gumeysigu
Wixii aan ku tuhuniyo
Tafaraaruq kii wada
Bulshada aan ka tuurnaan
Taariikh u leenahay.

Waa ereyadii Cabdi Aadan (Badey)

Haddana waxaan u geleynaa qeybtii **Gabayada** iyo **Geeraradaoo** iyaguna ay ku dheehan tahay murti aad u qaayo weyn, waxaana hadda bilaabanaya Gabay uu tiri doono Jaalle **Wadar Camey Barre,** waana sidatan:

Madxdii caanka ahayd
ee Soomaali weyn u gargaartay
Xornimada aynu u guuxnay
Albaab kasta u garaacnay
Labadii Gole caawa
Waanay gaafan yihiinoo
Guud ahaan fadhiyaan
Guddoonshihi waan aragnaa
Annaguna gooni ahaan
Waa u sii gogol xaarnay
Haydin gaarto salaantu
Gadgaddoonkiyo reerkiyo
Caawa gaadan ciyaarkiyo
Ubaxan geesta ka muuqdiyo
Nalalkaa galaclayniyo
Gariirka aad maqashaan
Gedda aan ula jeednana
Bishan weyn gudaheeda
In gaashaandhig lixaad leh
oo gayigeenna ilaalsha
Aan gaar ahaan u abaaurno
Waqtigii la go'aanshee
Ku guuleysannay weeye
Ciidankeenna gadaaman
Wuxuu noo galay maanta
Inaan guud mooyee
Kama gaari karaynee
Shalay maxay ka gudbeen
Maanta maxay galbinayeen
Berri maxaa la gudboon
Waa su'aal guda weyn
Shalay waxay ka gudbeen
Haddaan goob yar ka sheego
Golihii Sare oo dhan
Markey gees u baxeen
Waajibkooda guteen

Ee goolkii noo dhaliyeen
Umaddii gabaneysay
Cadawgii uu kala gooyay
Farxad gaada cayaar ah
Gagidaa la istaagoo
Ku golgoolo miyaa
Ma abwaano gayaayaa
Ooy awal gaagixiyeen
Heesaagoo garab taagan
Muuskiiste gurbaankiyo
Garidoodii xumbaarsan
Murtidoodii gofeeyoo
Ha diiwaan galo maantoo
Hala goosho miyaa
Ma buraanbur gu' weynoo
Gabdhaheennu marshaan
War ma saar cadameedkiyo
Geeraarkaa la jeclaadiyo
Ma guuraw tiribaa
Gaawahaan ganay maanta
Wadaantu wa gingineyd
Garbadan doogga lahaydiyo
Golshadu waa dhextaal
Bulshadeenna u gooman
Gef ninkii ku sameeya
Gacan dhaaf ku tuhmaan
Guddigaan u xilsaarnay
Guulahaan kugu dhaarshaye
Ha u gargaarin midkaasoo
Ha u garaabin miyaa
Gaaguurta aan jabinayno
Malabkaan ka gureyno
Midkii yar kugu raacnay
Nin walaw gacankaaga
Iska giiji miyaa
Badda guuxa inkaaran
Maraakiibta ka gooshta

Gasacaa hilibeysan
Markii aad gelisaan
Guraddiisa rartaan
adduunkoo dhan ha gaariyo
Ma shidaal kala gaariyo
Istariiin ku gadbaa
Abaar geeliyo maaliyo
Nafleydoo dhan gumaaday
Hadduu guulahay keenay
Ilaahay baa gacan weyne
Alaw nooga gargaariyo
Sujuudaan geb niraahno
Umadda garab siiyoo
Ku Guubaabi miyaa
Nin gaajaysan gun weeye
Soomaaliyaa guntadaay
Iyo ma galey falashaa
Wabigaa gingi maayo
Ma matoor geli baa
Ma aslaaxyo gawaanoo
Biyahaa lagu gaaxshay
Markii ay guraan
War ma gaaxdii dhex jiiftiyo
Dahabkii ka guraa
War ma mooska golweyniyo
Mareeray ka go' ayaa
Go' labaad la abuuray
Markuu geedahaan dhaafay
Mirihiisu garooriyo
Gomoshaa ha noqdaa
Ha go'aan xisbiyeed iyo
Ma gole laysku hanuunsho
Umaddaadu ha gaartoo
Ku gadaadi miyaa
Marshada gaamirtay maanta
Goomanaantii na haysiyo
Gafarkii naga reebay

Gacan weyn ina siiyay
Galadoodu xumbaartoo
Ku Gaadoodi miyaa
Ma qaraabadii baasiyo
Jaadadkii guunka ahaa
Laba ruux kala gooyay
Lacagteenii gubaayay
Xididkoon u guraa iyo
Ganacdoon hor istaagniyo
Ma gidaar jabaybaa
Ma iskaashato guudiyo
Guntin noo xiran baa
Ma fiidiyawga galbeedkiyo
Berri oo gangaansha
Galaaskii ka janjeera
Garwaajeedsi ku daawiyo
Ma guul la helaa
Gobaladu siday u dhismeen
Gadigoodba dhamaan
Gaar ahaan Muqdishow
Ma ilaa golaley iyo
Garba nuur ha qabtaa
Ma Dayniile Godkiisii
Gooflaydii degganayd
Farxadeey ku gamaaniyo
Rajo weyn gelibaa
Ma canshuurtii gadaadiyo
Cunadaa bixi baa
Waxyaalahay ka gudbeen
Ma sii gaari karaayee
Haddaan goob yar ka sheego
Ma guuguulihii qeyliyiyo
Shinbirkaa garda duuban
Gudurigii erinaayiyo
Markaad goodkii ka reebtay
Intuu gaaso baxaayo
Bahalkaa gabanaayo

Ka guurguuran karaayo
Qorbabkii ka jabnaa
Kaganta uu ka kabaayo
Gurigaaga dhexdiisa
Gabaad uu ku hooyada iyo
War ma gaaf u sameeyoo
Hoosta soo gelibaa
Ma dhufeys gelidbaa
War ma gaari raarbaa
Ma gargaar dejibaa
War ma goobo dagaaloo
Laysu soo gurmadaa
Ma gaashaan dab cadaaoo
War ma geeskan afkiisa
Markii ay gelgelinee
Goolanhaydii labaad
U gunuunac ekaatay
Wixii soo gelbinaayay
Intii aad gam ka siiso
Ku sii gaylab miyaa
Ma gabraarsatadii iyo
Gardaraw garabbaa
Ma gel toosiyihii iyo
Gorgorkii ha noqdaa
Ma goodaadadii baasiyo
Gamaarey ha luntaa
Calankeenna guhaadaw
Geesiyaashii u dhaartay
Markii ay runta gaartay
Iyagoon gabaneynin
Ku sii gaadan miyaa
Ma hasheenii gobaadiyo
Guusha soo gelibaa
Shalay waxay ka gudheen
Intaasaanu ku goyniye
Maanta maxay galbiyeen
Maanta waxay galbiyeen

Afrikaan gudihiisa .
Golaad aad u gabawday
Qarniyaa
gubanaysay
Hubka leysu gaday
Gumeysigii ka danbeeyay
Iyagoo garanaaya
Markay gaaf ololeysay
Saaxiibkii guntanaayee
Garabkooda istaagee
Meel kastaa la gelaayay
Iyagoo garanaaya
Danyeerka goorada saaran
Guumeyskii soo dhici waayay
Labadiisii gacmood
Gobka uu ku cunaayo
Gadawgaa xajinaaya
Maahmaahdaa gulucdeeda
Iyagoo garanaaya
Garoonka weynee Jabuuti
Shirkii gaarka ahaa
Gartii laysugu yeeray
Arrintii la gorfeeyay
Geesiyiin Afrikaan ah
Rag Guuleed Abtidoon iyo
Arab Mooy u go'weyn
Goob joog ka noqdeen
Weriyayaasha ka geesiyo
Ka geesteeda kaleeto
Garab yaacahayeen
Gurigay ku degeen
Taladii lagu gooyayu
Iyagoo garanaaya
In Siyaad gebigiisba
Gardarro uusan ku doodin
Gefna uusan ka qaadan
Iyagoo garanaaya

Labada gees magacooda
Farxad loo wada guuxay
Sacabka aan u garaacnay
Yay maanta soo gelbiyeene
Berri maxaa la gudboon
Berri wixii la gudboon
Ilaahbaa garanaaya
Go'aamada maanta horyaala
Inay gaasir ahaanin
Guud ahaan fuliyaan
Hashoodaa godolka qaaday
Soomaaloo dhan galoontiyo
Gaawaha ay u culayso
Shilinta aan ka gurayno
Af Libaax gudihii
Laba gaani dhexdooda
Badahaa gudbanaa
Gudcur aad u madaw
Inteey ooda galeen
Soo dabaal garbiyeen
Inaan goodi shisheeyiyo
Qabiil loogu cabaadin
Gaaka ay ka hayaan
Sidaasaa la gudboon
Hadal ku gudhanaa
Gabayguna noogu dhamaaday
Guddoonshe Ciidamadeenu
Geel inoo dhalay weeye
Hayiin aynu ku guurno
GUradiisu na deeqday
Na gardaadiyay weeye
Dadweynaw garo taasoo
Gam'a oo lagu seexdoo
Guddoonshe saa u ogaw.

Haddana waxaan bilaabaynaa GEERAAR uu tiriyay Askar, wuxuuna ka bilaabayaa:

Ciidamadaaaaa i shideeyay
Waa kuwaa cabaanaynoo
Misana aan wax cuneynin
Cid waxay ku yaqaanaan
Kabahaa cirba weyniyo
Tuutahaa cawlka gaduudan
Kaarahaa coobada weynliyo
Caara dhuubta rasaastay
Ku cay taarsan yihiin
Casarkii Alla keeniyo
Cir gaduuda aroortii
Cishihii ma gam'aanoo
Cadaw aynaan arkayn bay
Intaa cayrsanayaan
Waxa aan la cawdee
Cakudaa iga keenay
Maha ciidan necbaaniyo
Calooshoo i bugtee
Haddii aan kuu caddeeyo
Waad cisaari lahayd
Calaashaan qaladkooda
Caawa oo u danbeysay
Ceel Ibraahim agtiisa
Caruurtu ii degganayd
Waddadii Baar Cagaweynoo
Cirifooda maraysay
Cagta soo mariyeen
Iyagoo Ciiriyo boor loo
Dhammaan tood isku ceynoo
Cidi ay garan weyday
Bal ciyaal iska daaye
Anigoo Cabdilla ahoo
Caana oo la yaqaanaa
Keliyahaygii gelin waayay

Calaashaan cabsidooda
Baabuurtaa cududdoodiyo;
Cartankii ka baxaayay
Cashuumaa jajabay
Guryihiibaa wada ciiray
Calaashaan cabsidooda
Dukaamadiibaa wada ciiray
Calaashaan cabsidooda
Dukaamadii camirnaabaa
Dhammaantood is cunoo
Shayba shaybuu cantuugay
Calaashaan cabsidooda
Canug yaroo aan jeclaa
Caruurta u wacnaa
Carar buu is yiroo
Ilaamaa ciribtaas iyo
Ciribteeda kaleeto
Cududahaa mirahaa
Ee waa cajiib iyo yaabe
Ciidanka yaa xukumoo
Colka looga dacwoodaa
Calaashaan madaxdooda.

Haddana waa GEERAAR kale oo uu akhrinaayo Maradoon waana sida tan soo socota:

Caku wadigaa weeyee

Ragga ha iga gaasiyin
Waa adigaa cirba guusane
Hadaan ciidanka jooginoo
Cadawga kaa dhicinaynin
Dukaamadaan aad camirteen
Iibkoodii caadka la fuushay
ma ku cayshi lahayd
Haddaan ciidanka jooginoo
Cadawga kaa dhicinaynin
Biicaantaadaa cudoonood

Cambaha mooday Jamaame
Inta ay cishihii
Casha kuu kariso
Caaniyo yoogo ku siiso
Cawada kuu gogoshoo
Galoosha kuu salaalaaxdoo
Mala cayaari lahayd
Bal inaad caqligaagu
Hal cantooba dhammeyn
Islaantaan Cawrala Geeddi
Oo mid caruura lahayn
Ilaahaw ciidamadeenna
Cadawga uusan ka rayninbay
Cashar iyo diin akhridaayoo
Culuma ay u dhawaaqdaayoo
Casarkii bun dubtaayoo
Geesaamo ay ku sadqeysay
Bal inaan caqligaagu
Gantaalihii cuscuslaa iyo
Dayuurad cirka duuliyo
Nabaal ciidda gubaayaa
Caawiyoo maanta dhexdooda
Calaashaan daaficiddaada
Ayagoo kaa celinaaya
Intee Ciidda u jiifta
Ama intee ku cuuryaantay
Ma cisaday kaa sugayaan baad
Caku kuwaas ku dhigtay
Caawadaan ka bilaawoo
Labadeenna colownay
Haye haye
Cabdilaa hadlayee
Goobada soo kala jeexoo
Carka yeerka sidiisii
Adigoo cartamaayay
Cidda joogta akteenna
Codkaaga maqashiiyoo

Caruurta ha u gam i weydoo
Ama caawa dhaqaaqoo
Caqligaagaan arkayaaye
Col waxaad garanaysiyo
ciidamadoo dhan u yeeroo
Casarkii ha ila tageene
Cirka ha igu dubteene
Caanihii aad ka maashaan
ha iga siinin caddeys
Cirba gaaban lahayde.

Haddana waxaa noo bilaabayana GEERAAR ay tirinayso Foos waana sida soo socota:

Booliisku so ma aha
Ciidanka baaxadda weynee
Baladii la dareemiyo
Tuugga xoolaha boobee
balaankiinada qaatee
Baf ka siiya aibaabka
iyo kan walaalkii bireeyee
baxsadee dalka jooga
Bartay oo u xilsaaran
Oo bohol haddii lagu awdiyo
Buur ahduu fuulo dushiisa
Mar walba soo bixinaayay
Guulwaduhu saw kuwa ma aha
Laftoodii geed ku xiree
Danta guud isu taagee
CValaamadooda gaduudan iyo
Goodkiyo shaarka u qaatay
Ee kacaankeenu gardaadshay
Ee geesiyiinta ahaa
Geefanayaasha aan daaline
Gafuurkaaga ka jeedi
AF gumaasan lahayde
Asluubtu saw ma aha
Inta kaloo ciidamadaa ahi

Waxay soo ururshaan
Edebtu kay ka xumaatiyo
Afmiinshaar iyo tuug
Iimaha caasi garooba
Ay ku soo ururshaanee
Anshaxa loogu xilsaaree
Ubaxeenna haya
Waad aqoon xuntahee
Araxdii ciidanka weeye
Iiga jeedi afkaaga
Umuyohow nacaska ahi.

Haddana waa GEERAAR uu noo tirin doono Askar, waana sida tan soo socota:

Cudoonay caqligaaga
Aqoontaada fiirinayee
Ciidamadu waa wehelkaygii
Caawadaa ka bilaw oo
Waan cisaynay hayaa
Ciidamadu ha jireen
Ciidamadu ha joogeen
Cuuryaamiintaan booqanayaa
Caawimaan siinayaa
Wixii aan cunto keeno
Ciidamadaan kuwareejin
Ee codka aad ku hadlaysiyo
Balanqaadahaygii ii caddee
Waa cirkaa u lega iyo
Calaacashaasoo tima leh
Ee cuudu bilaysoo ina keen.

Haddana waa GEERAAR uu tirin doono Askar, waana sida tan soo socota:

Cabdulle laba calaamo mid dooro
Inaad ciidamadeenna
Caydiyo buuqa ka deyso

Oo caloosha aad u banayso
Oo madaxdooda ciisaysid
Oo caynaanka haay ku tiraahdid
Curyaamiinta booqaninoo
Caawimiyo xoola u geynin
Iyo dalaaqahaygii cusaa
Caawadaan aynu joogno
Carabkaaga haka yeerto
Carradaa aan kala aadno.

Haddana waa GEERAAR kale oo ay tirinayso Foos, waana sida tan soo socota:

Haddaad ciidamadeenna
Caasidoo wax ka sheegtay
Ilaahaw aan Cali dheerlyo
Cabdullaahiba waayoo
Caluuq aan ku baroorto
Calool sami kuugu shaqeyin
Caanaha ku shubi haynin
Cadna kuu karinaynin
Cawana kuu golahaynoo
Kuu riixriixin cagaha
Calafkeen soo kala qaadnaye
Carlada naaga u doono
Aabahay car lama orane
Anigana ka camal xumi.

Haddana waa GEERAAR uu tirin doono Ereg, waana sida soo socota:

Meleteriga xoogga dalkeeniyo
Ma huraankii aanu jeclaynee
Xornimadeenna macaan iyo
Calanka muunada weyn leh
Makaabkoodii ahaayaw
Mutacalimiintii waddankeeniyo
Aqoonyahaniinta la miiriyo
Maalqabeenkii dhammaan

Anagoo ka ma'uuloo
Magacoodii ku hadlayna
Marka hore wayidin salaanay
Masaafooyinkii aan soo soconayniyo
Sababtii meesha na keentaan
Macnaheeda dhabta ahaan
Idiin muujinayaaye
Annagoo mabda' toosanoo
Mideeyaha Jaalle Siyaad
Meerisyadii aqriskiisiyo
Qudbooyinkiisa ku muujey
Macaansanayna xaqiiqda
Waxaan maanta jeclaanay
Meelaha aad fadhidaan iyo
Madhaafaanka nolosheeniyo
Majaraha daafaca jiidda
Marar ka fal dagaal iyo
Muujinaysaan qaab dirireed
Maskaxdiinna aqoonta
Halka ay marayaan
Inaan maanta ogaano
Muraadkeenaa ahaaye
Mirkaan nooga jawaaba.

Haddana waxaa inoo tirin doona Murti jaallee Kaa dheeri, waana sida soo socota:

Gaadiidka beesha ku guurtiyo
Gurgurshaa caana ma daadshiyo
Hayiinka geediga dheer leh
Isagoo guradiisiyo
Garabkiisa la saaray
Guurboodka kii socon waaya
Gugu meeshuu ka hooray
U garqaada hayee
Gal xareedu ay jiifto
Geeda saadliyo doog
Gumashaakiyo ciidankoo

Miiddu ay go'go'leyn
Galool meyrax lohoo
Gabdhuhu diiranayaanoo
Hidaheenu ma guuro
Dhaqankuna waa ma guuraane
Gogolkii xardhanaa iyo
Kabiddii gargareydee
Dufka gees ku lahayd
Haarar guudka la saariyo
Raarta qaar ku gadaaman
Oo gurgurka ay isxigaan
Garka haamaha saarka
Gedaanka loo xiraayiyo
Guri ay ka sameysan
Ee guulaheen isna siiyay
Gaadiidka ay ka helaan
Iyo garwadeenka Hoggaansha
Ee nimcadaa garansiiya
Hubaal waa geeshka dalkeenna
Bal garaadkiina u sheega.
Waxaa kaloo garab taala
Gobannimada aad u macaanee
Guuleheen ina siiyay
Calankaa guudka ka saaran
Markii uu gilgishee
Inuu gaaro barwaaqiyo
Guusha reys leh ha joogtee
In garabraarta haweestiyo
Gacan shisheeye uu ku sigtoo
Galawgiyo fiintu dhawaaqday
Gam i weyday ugaadhu
Geesiyaashii u bexee
Dadkii uu ku dhacaayiyo
Gumeystihii ka badbaadshay
Oo sharcigeey gembiyeennee
Geedka ay ku xireen
Carbaduubkii ka furay

Go'aamaday dejiyeenee
Gundhigoodu ahaa
In cadaaladda la gaarayoo
Soomaali weyn gabigeed
Gacantaa faraheeda
Cuud ahaan la yahoo
Garta eexa dhammaatay
Oo qabiilkii la guboo
Gebi dheer laga tuuray
Gacalkood ugu baaqayee
Garansiiyey wanaagga
Hubaal waa geeshka dalkee
Bal garaadkiina u sheega.
Waxaa kaloo garab taal
Qorraxdoo gaabatayoo
Habeeyn uu soo galayoo
Gudcur ay tahayoo
Nin walbaa gurigiisa
Gudaha uu u fariistay
Gam'ayoo wax ogeyn
Gucumaalaha aaroo
Micidiisa galoolan
Soo giriiri xinaayiyo
Bahal guud al xiraahdiyo
Abris soo gabanaayoo
Jilbis guura habeynkoo
Micidduu wax la gaariyo
Goobanayaa naflayda
Shabeelkii gargaraa iyo
Dawac guuniyo weer
Dhurwaa geedada taagi
Intaasoo masiiba geestii
U ugaaranayoo
Idiin soo geli laa
Kuwa haysta gantaalle
La dhacayaa gamuunkee

Gayigoo dhan ku geyran
Hubaal waa geeska dalkee
Bal garaadkiina u sheega
Waxaa kaloo garab taala
Xilligu wuu is guraaye
Guyaal dhawra markii
Gabo' roobka la waayee
Abaar geeda ma reeba
Gayiga ay ka dillaacday
Oo gacalkeenii baadiya joogay
Guunyadu dhaqanaayiyo
Xoolihii ka go'een
Dadkiina gaajiyo oon
Ay la soo godgoteen
Geesiyadii mirmadee
Gargaarka u fidiyee
Webiyada gilicleyn iyo
Badweyntaa u kala gooyay
Markay gaaja baxsheena
Gacmahoodii wax ku bareen
Gaarsiiyay heerka wanaagsan
Hubaal waa geeska dalkee
Bal garaadkiina u sheega.
Waxaa kaloo garab taala
Gurboodkii haatan koraayiyo
Odayaashii gaboobiyo
Hooyada aan gacanteeda
Wax ku goosan kareyn iyo
Hablaha guudka dabaayo
Ganacsiga qaabka u jeeda
Shaqaalaha gayigeena
Qaarba gees ka hayee
Markuu waaga gaduuto
Ninba goobtii uu lahaa
Guntiga u xiranaaya
Isu gee dhammaan

Geedka ay haraadaan
Haddana ay ku ga'aan
Hubaal waa geeska dalkee
Bal garaadkiina u sheega.
War haddii aan gabya oo
Geeraarka ali badiyoon
Caawadoo dhan garaaco
Waxa uu gudo xoogu
Ama uu galo
Lama gaari karaayee
Gafuurka unbaa igu daali
Waxaadsee garataan
Inuu yahay geeshku
U gargaaraha beeshu
Gacansiiyay dadkooda
Ku guubaabiya khayrka
Waligood garab taagan
Gaarhayahooda aan seexan
Sidaasaanu gaadiidka beeshoo
Lagu guuro aan ku ahaanay.

Haddana waa **Geeraar** inoo tirinayo **Jaalle Xasan Carab.** oo ah isla Erayadii **Xasan Carab.**

Jaallayaal maxfalkaan maanta la joogo
Marti qaadkan ballaaran
Maal qabeenkii waddankeeniyo
Jaamacadaheenna mudnaan iyo
Geesiyaashii marayaan
Macna weynbaa ka danbeeya
Waa idiin muujinayaa
Marka iigu horreysa
Salaan aad u macaan
Aan macallinka ummaddeeniyo
Madaxweyne Siyaad
Maamuskiisa xan baarsan
Maanta iga guddooma
Waxyaala aad u muhiim ah

Yaad weligiin maqashaan
Mugdina kaaga jiraa
Ciidammadeena Jiidda ku meersan
Ee midnimadeenna adkaatiyo
calankaa muunadda weyn
Ka hor jooga masiibo
Aan magaalo aqoonin
Maatidoodii ilaaway
Magaceenna kor u qaaday
Shacbigii mahadsheen
Milic aan harsanaynin
Dhaxanta saa u maloogan
Madfacooda dul saaran
Mayalka u soconaayiyo
Mitiriskiisa yaqaana
Ee ninka maanta ridaaya
Malkaduu cadaw joogay
Xabbadduu ku maqiiqay
Meesha ay ku dhacayso
Maskaxdiisu taqaano
Haddii uu yara moodo
Markiiba soo gelinaaya
Hadday meel soke taala
Mitir hiij kor u qaada
Ee mataankiisa hoggaansha
Halawduu maqalyaaye
Midig leexin sameeya
Cadawgii ku malaasa
Inaad maanta baxdaan
Oo dalxiis aad ku martaan
Muddo aad la jirtaan
Manfac aad la cuntaan
Oo malkooyinkay fadhiyaan
Iyo meelahay ku jiraan
Ishu waa macaline
Inta maarta curyaanta

Ee lugihii ka marillay
Masilbadii gaadhay dagaalka
Booqashahiina macaan
Haddey maanta arkaan
Waa kuwii u mudnaa
Oo moraalkaa u dhismaaya
Isha inaad soo marisaan
Militeriga aad aragtaan
Middaa waa soo jeedinayaa.
Marxaladihii kululaa
In dhaweyd aynu maraynay
In kastaa naf iyo maalba hurteen
Oo muggiina qaadaneyseen
Jaalayaal inaan mira baaro
Dhulka miiga ku aasno
Macdanta aan ku dhaqaaqno
Webiga moosku faruurmo
Wershedda aad u muhiimia
Maal gelin aan ku sameyno
Maanyada aan ku dhaqaaqno
mabdi'ii xisbigeennaa
Maskaxdii Jaalle Siyaad
Waqtigaan aan ka macaashno
Wax meel dheer laga keenay
Maqal noo korin maayo
Magac noo kordhin maayo
Macluul iyo gaajiyo
Mugdi waa inaan ka baxnaa
Muruqa aan isu geyno
Midkaasina weyga dardaaran.

Haddana waa **Murti** uu tiri doono **Tahlili,** waana sida soo socota.

Mar haddaad kuligiin
Rag tacliinta meel fog ku gaariyo
Aqoon yahanmiiraa tihiinoo
Misna aad garateen

Meeluhuu cildanka joogo
Jiidheena ku meersan
Inaad soo mar-martaanoo
Maalmo aad la jirtaanoo
Booqataan macnahoodoo
Markaa aad fahantaan
Muhiimadeyn u hayaan
Soomaali magaceediyo
mahadi ha idilinka gaarto
Hubkaan meesha hortiina
Ka muuqdee aragtaan
Iyo qaar kaloo meel ku qarsoonba
Waa madaafiicdii goobta dagaalka
Cadawgeenna meel kasta joogo
Waa hubkuu soo mari waayoo
Nooga maaganhayoo
Isticmaarka muquunshoo
Magaca xooggu ku dhaato
Ragga maamulayee
Madaalayaasha ahee
Mar walba taagan hortooda
Midkoodaan ahaye
Aan tusaalo muhiima
Meelo idinka iftiinshee
Miyir iiga dhegaysta
Madficii toban wiilbaa
Mitirkiisa yaqaanoo
Maamuloo ka shaqeeya
Mid saliidda ku miisa
Cabeeyaha meel dhexe taagan
Shiishaha moosinka fuushan
Amarahoodo ku mataansanooy
Hadba maalka uu siiyiyo
Hadalkiisa maqlaan
Intaasoo ay ka mid yihiin
Cadawgaynu ismaagno
Madfacuu soo ridaba

Inta ay minidooda
Markaa ay xabbadilisu
Nagu soo maqantoo
Hawada soo dhex marayso
Mawdeedaan ku naqaan
Meeshuu yaal qorigaas
Inta uu mirir joogiyo
Midka uu yahayba
Markaasaa si toosa
Meeshuu yaala gubnaa
Milaaanka aan ku shaqeyno
Macnihiisu waa kaa
Makanna soo baxa jaallayaal
Meelaa noo haraye
Aanu soo marmarnee.

Haddana waa Geeraar uu soo tirin doono Xalwo, waana kan soo socda.

Geeslyaashii mudnaayee
Dharaartay muruq joogtiyo
Iamaandhaaf garan waaga
Maylinka laysu afaystoo
Mushkilaadda ay kor u duusho
Midigtooda sareysee
Meel kastoo aanu joognana
Magacoodu ku jiifnaw
Ujeeddadii meesha na keentiyo
Soomaali weyn ka macaashoo
Muhiimaddii weynu sal gaarnay
Makooyinka aad fadhidaaniyo
Meeluhuu hubka yaala
Sida aad mush-mushooxa
Noogu soo marisaan
Qiira maanka ku raagtiyo
Muxubey nagu reebtay
Magaca xoogga ha waaro
Sharafbaad mudan tihiine

Mahad haydin gaarto
Middaa aan ka gudbee
Haddii oliddaa mugeed
Miisaaniyadu noo fasaxdoo
Maskaxdeenu na siiso
Waddankeenna macaan
Maal gelin inaan ku sameyno
Maalkeyn noogu jirtaa.

Haddana waa **Murti** uu **Diidey** noo tirin doono, waana sidatan soo socoto :

Waagii beryaad buun iyo
Buun iyo qeylo wedeenoo
Soo baxay la lahaa
Oo sidii beelo hayaana
Iyo cid basiin qodanaysoo
Meel dagaal ka ka bilawday
Balaayo ay ka dhacayso
Boorkuu uu kor u duulay
Tiro wey ka badnayd
Waxna nooma baxaan
Bulshooy mee bilihii
Buruskaan kor u qaada
Dhagxaanta aad u baduuga
Nagu baabi'iseen
Beerkiisaa na caddaaday
Dhegihiibaa na ballaartay
Qalbigiibaa na bukooday
Biyo nooga daroo
Naga daaya bulaanka
Haddaan haatan bareeroo
Barqaddii aanu dhaqaaqno
Waxaan soo bixinayno
Bisil yaa garanaaya.

Haddana waa **Geeraar** uu noo tirin doono **Xasan Gabay**, waana sida soo socota:

War badawbaa tahay weyee
Kacaankaan barakaysan
Ummaddiisa bailaaran
Intuu kheyr ugu baaqey
Oo lagu gaaray baraare
Bohoshil uu daboolliyo
Basaastuu naga meyray
Bahalladuu naga cayrshay
Tiro waa ka badnayde
Khamraa aad bawd ku cayaartiyo
Turub aad baf ka silsiyo
Dad aad boorso ka qaadoo
Barkood aad ka xadoo
Halkaa ruux ka bukooday
Lagama waayo balaayee
Biiriqaadnimadaasiyo
Haddadan been ku maqneyn
Anagaa ku bareynee
Bayaan nooga dhegayso.

Haddana waa **Geeraar** ay noo tirinayso **Foos**, waana sida soo socota:

Nacasyohow gawsaha weyn leh
Waxyohow oo gees walba seegay
Markay xaajo gadootee
Gumuc laysu afeystee
Ragga gooye cadaawee
Nacabkeenna gumaadee
Marna noo ah gabaadkiyo
Geedka aan habsanayee
Gaarhayaheena aan gameynin
Habeenimo kii nagaadi lahaa
Ilaasha haddii aad garan weyday
Gabar maahid ragna gaari weydaye
Ama gaax ama riin.

Haddana waxaa Geeraar noo tirin doono Xasan Carab, waana sida soo socota :

Geeslyaashii xoogga dalkaw
Daa'inkii ina uumiyo
Deegaankaa uu ina siiyay
Calanka dusha saaran
Dadweynaheena wanaagsan
Iyagaa noo dirtay hawsha
Waajibbaa na dulsaaran
Doqonnimo ma ficna
Ninkii aan isduleynin
Ilaahay ma dacilfsho
Wax badanna waynu difaacnay
Dadweynaheenna kacaanka
Duulal;kii ka xorreeyay
Shacabkoo la dulmaayoo
Dahahlisa laga weecshay.
Xornimaduu u dagaallamay
Dad badani ay u dhinteen
Danbarkeedii la dhammaayo
Qaada loo dari waayay
Ummaddoodoo la duleystay
Haddii aad u dagaasho
Oo dhibka aad ku dulqaado
Magacaaga gaaro daruurta
Denbi dhaafba waa ku jiraa
Ma duulle Jaalle Siyaad iyo
diricyadeennii kaleeto
Deg deg waa tii ila fariistay
Iyagoon dooda ku raagin
Durba waa tii la go'aanshay
Ma daruufahan xaala
Ayaan maanta daawan karnaa
Ma calankaa doogga la moodo
Anaagoo dalka joogno
Dumi maayo runtii

Geerigaan door bideyna
Diiwaankii la saxiixiyo
Dagaalkii loo qalab qaatay
Waa taan deg deg tuutaha boobnay
Ee daalimiinta gabawday
Durba soo bixinay
Askartii dananaysiyo
Kaarayaashii ku deyray
Dadweyneheenu dhammaan
Derbiyaalkii soo jebiyeen
Dariiqyadii istubeen
Farxad ay tumayeen
Hantiwaadaaggi doorka ahaa
Dirica uu ku dhawaaqay
Dadkii uu u siunaaday
Dhismahaa laysu dareershay
Daljirayaal weysla ogeyn
Abaartii daba dheer
Daacuunkii ka dabnaa
Diifaankii bari qaaday
Qabiilkaan subax duugnay
Jahligaan dabar goynay
Ka xoraynay dalkeenna
Dabaabaadka aan marinaynay
Calan aan ka dul taagnay
Gumeystayaalka duqoobay
Dib inoogu soo celiyeen
Daakhilkeediyo hoostiyo
Dariimadeyno ku jiifno
Dib u socodkii ka kacaayay
Danta guud ka horjeeday
Daqiiqadeynu ogaanba
Durba aan qabanaynay
Shacbiga aan u diraynay
Daljirayaal weysla ogeyn
Dunidana waad aragteen
Dab ayaa ka baxaaya

Falastiinta la duugay
Beyruud dhiiggaa ku daatay
Doorkuu khaliijku maraayo
Afrikaanka la dooxay
Buntukha laysugu dhiibay
Sidii deyriyi cawsha
Laysu soo didinaayo
In dagaalkii seddexaad
Dunida uu ka dillaaco
Dersi waa u qaadan karnaa
Jaallayaal dardaaran waa leys faraa
Deg deg waa u.fulaa
Duruus noo dhigan weeye
Qaranka daaficiddiisa
Daryeel toosin kacaan
Dadaal hawlgal xisbi
Bulshada daadihinteeda
Yaa la inaga doonayaa
Ee dariiqey ku xirtaan
Dadkeena aan u sameyno
Nin kastaba docdaada
daldalool yuu ka imaanin
Dardaarànna waa iga intaa.

Haddana waa **Geeraar** uu noo tirin doono **Ereg,** waana sida soo socoto:

Ninka Jooga adduunkee
Ilaahey cilmi siiyoo
Iftiinka waaya ku raaga
Subaxdii alla keenaba
Shani aanu idayniyo
Amuur horluu la kulmaayoo
Indhihiisu qabtaan
Ninkaygii aad ogeydoo
Aqoonta taala dalkeeniyo
Ku ijtihaaday tacliintoo
Jaamacaddiisu idlaystoo

Aqoonsigii ugu sarreeyiyo
Inta A.M. la siiyay
Haddana sii amba qaadoo
Adduunkaana naga dheeriyo
Ingiriiska dalkiisa
Inta dhoofka ku aaday
P.M. oo ka danbeysay
Iglan loogu saxiixay
Hadna sii amba qaado
Ameerikaanka dalkiisiyo
Washintoon ku abaadoo
P.H.D. ku adkaadoo
Afarta lawriya haystay
Ummadna ay u taqiinay
Injidheer gacma dheeree
Arday baa soo baxay wiiloo
Farta loogu adeegoo
Bal waxaa eega la yiraahdo
Arrinta iigu darnaydoo
La ilaawi kareynoo
Abidkeey aanan fileynbaan
Idiin sheegahayaaye
Iminkadaa ka horoow
Dad aqoon aan laheynbaan
Askarteenna u haystee
Waxaan soo arkay maantoo
Amakaag iyo yaabiyo
Argagax aan u dhintay
Aalataleeri dhacaayoo
Meel fog oon la arkeyniyo
Afar buurood dhexdood
Lagu aadinaayo
Abbaartiisa aan lala seegin
Inamadaa ridaayaane
Xabbadda uubada weyn leh
Madfacooda afkiisa
Marka ay ka aguugto

Inta ay aoconaysiyo
Awoodeediyo xoogga
Iibiriqsigaa ku yaqaan
Qaar kaloo la arkeynbaa
Ayagoo ayda dhex jooga
Amarka soo bixinaayay
Afgarasho ay ku hadleen
Ereyo aan ka xasuustaa
Tilmaantoodu ahayd
Deg deggu weyska intaas
Fogaanta weyska intaas
Leexintu wayska intaas
Iyo qaar kaloon la aqoonin
Abaabulkooda dagaalkiyo
Uruursanaanta raggaas
Sida ay idilkood
Ul iyo diir u yihiin
Ama ay ummaddooda
Ninka aabi ku maaga
U eedsiinahayaan
U maleyn kari meyside
Markaan eegay kurtood
Waa isu aabiyo will iyo
Laba uur wada jiiftoo
Ereyo buug ugu xaalabaa
Dhammaantood loo akhriyaayoo
Afgarashaa ka dhaxaysoo
Ninkaan saas u ogeynaw
Haddeer saas u aqoonso.

Haddana waxaa **Murti** noo tirin doono **Dildey,** waana sida socota :

Geeska dhiiladii taaliyo
Colaaddii ka dhmaatoo
Nabadbaa dhcday weyn
Dhan walba waa la heshiiyay
Dhul hub dhiinjar ah xaalo

Xabbadi ay ka dhacaysoo
Jiidaha aad dheedheeraydoo
Dhuudhuub aad ku jirey
Raaxa aad dhaayaha saartiyo
Kaa dheerayd naxariisoo
Halka dhayladu taalo
Dhalllinta ilbaxa ihi
Dhaaniska ay ku ciyaarto
Baararka aan ku dhex geeybe
Gabdhaha dhabankoodiyo
Dhalaalkooda la yaaboo
Dhuucas aan ku baree
Tuutaha soo dhigo meel
Bal dhufeyska ka soo bax
Dharka maanta caddeyso
Dharaaraan kuu tumayaaya.

Haddana waxaa **Geeraar** noo tirin doona **Xasan Gabay**, waana sida soo socota :

War waa taad maalin dhaweyto
Ku dhacsiiyay wanaagiyo
Dhismihii waddankeeniyo
Sida aan dhaqmeynee
Ma markaad dhaba toosan
Ku dhaqaaqi lahaydbaa
Dhagaraw nimadaada
Dadkii aad dhabaqinaysoo
Dhiilada aad ku abuurtoo
Dhalanteed iyo been
Woxooda aad ku dhacaysay
Ma intaad soo dhuujisaad
Ciidammadii joogay dhufeyska
Aad u soo dhigatoo
Gobannimadey dhawra hayeenoo
Dhaarta ay u mareen baad
Intaad dhuubto afkaagood
Waajibkii iska dhaafa

Hadda aad ku dhawaaqday
Mid leys dhaansadiyoo
Dhoohaanbaad ila tahee
Dhulka Eebe la goo
Ma dhilgbaadan laheyn
Ma warkaan ku dhacayn
Markay dhawr xabadood
Dhaafoorka kaaga dhacaawbaa
Markaasaad iska dhaafi.

Gabayada, Geeraarada iyo Murtida aan kor ku soo sheegnay dhammaan waa erayadii ka soo maaxday Maskaxdii Abwaan **Maxamed Nuur Xasan (Shareeco).**

Haddana waxaan ugu danbeysiinayaa murtida Buuggan ee isugu jirta waxyaabo badan oo faa'iido badan leh sida anigu ay ila tahay oo ahay qoraha Buuggan, isla markaa waxaan codsanayaa aqoon yahaannada Soomaaliyeed in ay noo soo tebiyaan haddii ay wax dhaliil ah ku arkaan ama wixii naga maqan ay noogu soo diraan, taasoo ula jeeddadeedu tahay nin kasta oo qoraa ah in ay suurta gal tahay in waxyaabo badan ka baxsan karaan oon la wada koobi karin qalinka afkiisa waxa uu buugga ku qoro iyo maskaxda uu ka soo qaato.

Taa ula jeeddadeedu waxay tahay ee aan ula dan leeyahay fikraddu waxay ka timaaddaa maskaxda waxaana u adeega gacmaha iyo indhaha, waxaana lagu qabtaa qalinka waxaa lagu qoraa warqadaha loo habeeyey in mar kastaba laga helo waxa xusuusta ka maqan ee laga dhex helo awoood taas buuna aadamigu ku gaaray horukac weyn ee mar kasta kayd ah laga helo buugaagta dhexdooda.

Waxaa qoray G/le Sare
Dr. Maxamed Nuur Xasan (Shareeco)